

Kartida Muhiimka ah

*ee loogu talagalay Daryeelka Caruurta
Da'da Dugsiga iyo Xirfadlayaasha
Waxbarashada Labalaadhiyey*

(DAABACAADII LABAAD)



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Mawduucyada

| | |
|--|----|
| Qoraal ku Saabsan Daabacaada Labaad | 2 |
| Mahadnaq | 2 |
| Daabacaada Labaad..... | 2 |
| Hordhac | 4 |
| Mabaadii'da Nashqada | 4 |
| Guud-marka Qeybaha Tusmada..... | 5 |
| Akhrinta Kartida Muhiimka ah | 6 |
| Heerarka..... | 6 |
| Isticmaalka Kartida Muhiimka ah..... | 7 |
| Doorka | 7 |
| Daryeel-bixiyayaasha tooska ah | 7 |
| Agaasimayaasha | 7 |
| Maamulayaasha Barnaamijka..... | 7 |
| Qoysaska/Daryeel-bixiyayaasha..... | 7 |
| Shuraakada Bulshada..... | 7 |
| Dugsiyada Dadweynaha (K-12)..... | 7 |
| Tabobarayaasha | 7 |
| Ururada Tababarka..... | 7 |
| Shaqaaleysiinta iyo Soo-dhaweynta Shaqaalaha Cusub | 7 |
| Caawinta Horumarka Xirfada Shakhsiga..... | 8 |
| Kartida Muhiimka ah iyo Tayada Barnaamijka..... | 8 |
| Gunaanadka | 9 |
| ■ Tusmada Qeybta I. Sinaanta Jinsiga iyo Kajawaabista Dhaqanka | 10 |
| I. Sinaanta Jinsiga iyo Kajawaabista Dhaqanka.... | 10 |
| ■ Tusmada Qeybta II. Badqabka iyo Caafimaadka .. | 11 |
| II-1. Badqabka Deegaanka..... | 11 |
| II-2. Badqabka | 12 |
| ■ Tusmada Qeybta III. Korniinka iyo Horumarka.... | 13 |
| III. Korniinka iyo Horumarka | 13 |
| ■ Tusmada Qeybta IV. Barashada Deegaanka iyo Manhajka | 14 |
| IV-1. Abuurista Deegaan Waxbarasho iyo Manhajka Guud | 14 |
| IV-2. Kor u Qaadista Horumarka Jidhka, Bulshada, iyo Maskaxda..... | 15 |
| IV-3. Kor u Qaadista Is-Qeexidda: Xirfadaha Xidhiidhka iyo Hal-abuurka | 16 |
| ■ Tusmada Qeybta V. Lamacaamilka Caruurta/ Dhalinyarada..... | 17 |
| V-1. Siinta Tilmaamta Gaarka ah si looga Caawiyo Hab-dhaqanka iyo Khilaafyada..... | 17 |
| V-2. Kor u Qaadida Khibradaha Kooxaha | 18 |
| ■ Tusmada Qeybta VI. Awoodsiinta Dhalinyarada .. | 19 |
| VI. Awoodsiinta Dhalinyarada..... | 19 |
| ■ Tusmada Qeybta VII. Indho-indhaynta iyo Qiimeynya Canuga/Barbaarka | 20 |
| VII. Indho-indhaynta iyo Qiimeynya Canuga/ Barbaarka..... | 20 |
| ■ Tusmada Qeybta VIII. Qoysaska, Bulshooyinka, iyo Dugsiyada | 21 |
| VIII-1. Xidhiidhada Qoysaska | 21 |
| VIII-2. Shuraakada Bulshada | 22 |
| VIII-3. Shuraakada Dugsiyada lala Leeyahay..... | 23 |
| ■ Tusmada Qeybta IX. Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka | 24 |
| IX-1. Qorsheynta iyo Qiimeynya Barnaamijka.... | 24 |
| IX-2. Maamulka Shaqaalaha iyo Maaliyada..... | 25 |
| ■ Tusmada Qeybta X. Horumarinta Xirfada iyo Hogaaminta | 26 |
| X-1. Kago'naanta iyo Masuuliyada | 26 |
| X-2. Horumarka Xirfada Joogtada ah..... | 27 |
| X-3. Hogaaminta iyo Olaleynta..... | 28 |
| Tixraacyada | 29 |
| Tusmada A: Eray-bixinta..... | 30 |
| Tusmada B: Taariikhda..... | 32 |
| Tusmada C: Qalabka Is-qiimeynya | 33 |



Qoraal ku Sahabsan Daabacaada Labaad

Horumarinta Kartida Muhiimka ah ee asalka ah ee Daryeelka Caruurta Da'da Dugsiga waxaa taageeray School's Out Washington, oo uu weheliyo hogaanka iyo isku xidhka Jackie Jainga Hyllseth, Emily A. Emerson, iyo adeeg-bixiyayaasha waxbarashada la balaadhiyey ee Washington. Gudida kartida muhiimka ah ee dalkoo dhan iyo School's Out Washington ayaa kala shaqeeeyey Xulafada Jiilka Xiga ee Dhalinyarada si ay dibu eegis balaadhan ugu sameeyaan qaab dhismeedka kartida muhiimka ah ee hadda ka jira dalkoo dhan. Daabacaada koobaad ee Kartida Muhiimka ah waxay kasoo qaadatay qaab dhismeedka bilowga Kartida Kansas iyo Missouri ee Horumarinta Xirfadaha Dhalinyarada.

Sanadkii 2021, Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada iyo Qoysaska, DCYF) ayaa codsatay warbixin si loo hubiyo in kartidu ka turjumayaan deegaanka iyo xeerarka hadda, oo ay ku jiraan nidaam kor u qaadis loo siman yahay iyo casharada laga bartay natijadii xanuunka COVID-19. Daabacaada labaad waxa hogaaminaayey Fasax Dugsiyada Washington oo ay weheliyaan Kooxda Latalinta Qaranka iyo kooxaha gobolka ee matalayey juqraafiga gobolka, kala duwanaanta isirka, jinsiga, iyo xirfada.

Iyadoo lagasoo dhisay daabacaada koobaad, Kooxda Latalintu waxay sahmisay nashqadaha xirfada ee ay diyaariyeen Ururka Daryeelka Caruurta iyo Dhalinyarada, Beyond School Bells (Nebraska), Department of Education (Waaxda Waxbarashada) ee Michigan, Family and Social Services Administration (Maamulka Adeegyada Bulshada iyo Qoyska) ee Indiana, Ururka Kadib Dugsiga, Department of Youth and Community Development (Waaxda Horumarinta Bulshada iyo Dhalinyarada) ee NYC, Degmada PrimeTime Palm Beach, iyo Department for Children and Families (Waaxda Caruurta iyo Qoysaska) ee Vermont. Wawaanu uga mahadnaqaynaa fursada aanu u helnay inaan wax ka barano dhammaan ururadan iyo adeeg-bixiyayaasha waxbarasho madaama ay gacan kageysteen qaabeynta nidaam horumarsan oo tayo leh ee Washington.

Mahadnaqyo

DAABACAADA LABAAD



Waad mahadsan tiihin shaqaalaha Fasaxa Dugsiyada Washington, gaar ahaan Sheely Mauck iyo Kelly Riffer, iyo sidoo kale Kooxda Latalinta Xeerarka oo suurto-galiyey Daabacaadan Labaad. Wawaanu sidoo kale u mahadcelinaynaa kaqeybgalayaasha Kooxda Wareysiga oo aragtiyahoodu si toosa wax uga tareen dhukumentigan.

Waxaan jeelaan lahayn inaan u mahadnaqno shaqsiyaadkan soo socda ee suuro galiyay in shaqadan ay qabsoonto:

Xubnaha Kooxda Latalinta

MARGARITA ALAMAN

Adeega Waxbarashada Degmada 123

APRIL MILLER

Fasaxa Dugsiyada Washington

SAMANTHA STEVENS

Adeega Waxbarashada Degmada 112

KRISTA GALLOWAY

AYD Geek

KATYA MILTIMORE

Naadiga Wiilasha iyo Hablaha Washington

NERRISAH TOWNSEND

Fasaxa Dugsiyada Washington

SUSAN MACCLEARY

Kharyaadka Daryeelka Caruurta

SHAK SANDERS

Guryaha Xaafada

COURTNEY WHITAKER

Washington Xulafada YMCAs

JAYMIE MC LAUGHLIN

Kharyaadka Daryeelka Caruurta

MIMI SANTOS

El Centro De La Raza

VASILYA MENDYBAEVA

Department of Youth, Children, and Families (Waaxda Caruurta; Dhalinyarada & Qoysaska) ee Gobolka Washington

LEANDRA SHELTON

Mu'asasada Ardeyda Tacoma



KARTIDA MUHIIMKA AH ee loogu talagalay Daryeelka Caruurta Da'da Dugsiga iyo Xirfadlayaasha Waxbarashada Labalaadhiyey (Daabacaadii Labaad)

Kaqeybgalayaasha Kooxda Diirada

RACHEL SMITH

Naadiyada Wiilasha & Hablaha ee
Sammamish

ANDREW PHAM

Guryaha Xaaafada

LORI NELSON

YMCA

JO HAMER

Qadada

KAIRA GOMEZ-GARCIA

TOGETHER!

RON MCHENRY

Naadiga Wiilasha & Hablaha ee Degmada
Skagit

DEBORAH BARNES

Golaha Madadaalada

ISIS LARA FERNANDEZ

Qadada

JANA MILLER

YMCA

CHRISTINA TRADER

Naadiga Wiilasha & Hablaha Degmada
Skagit

ANKITA GUPTA

Living Well Kent

EMILY SESNON

Little Edisons School

LUCIA MARTINEZ

SWYFS

SHANNON MILLCAN

Whatcom Family YMCA

LATALIYE MASHRUUC

JENNIFER CURRY, ED.D.

Saameynta Isbadelka

TAFATIREYAASHA

SHEELY MAUCK

NERRISAH TOWNSEND

KELLY RIFFER

MARTHA ZUNIGA

Xarumaha Horumarinta Dhiirrigelinta

MEGAN PROOST

YMCA ee Degmada Snohomish

SHANNON MARCHAND

Kids Club Afterschool Program (Naadiga
Caruurta ee Barnaamijka Dugsiga Kadib)

NATHINNEE FRIEDRICHSEN

SPIN

LAURA ARCE

Nisqually Head Start

MARTIN FORTNEY

Koolejka Dugsiyada Dadweynaha

STEFANIE PRATT

Communities of Rooted Brilliance

JUSTINIAN PANG

Qadada

EDIE HIGBY

Rural Resources Head Start Early Learning
Program (Barnaamijka Khayraadka Miyiga
ee Garab Qabashada Waxbarashada Hore)

MICHELLE TURNER

Naadiga Caruurta ee
Madadaalada & Jirdhiska

NATALIE ELWANGER

Naadiga Wiilasha & Hablaha Degmada
Lewis

MARWA SADIK

Xarunta Bulshada Reer Ciraaq ee
Washington

JESSICA HABBE

Qadada

SHERRY HELTON

Xarunta Waxbarashada ee Lacey

CHRISTINA TRADER

Naadiga Wiilasha & Hablaha Degmada
Skagit

MELLISSA CORPOS

Samafalka Katooliga

DEITRA MILLER

St. Anne's ee Xarunta Caruurta iyo Qoyska

ARACELI OROZCO

YMCA Walla Walla





Hordhac

Horumarinta xirfadlayaasha kadib dugsiga iyo dhalinyaradu waxay door muhiima ka ciyaraan bixinta waxbarasho tayo-sare leh iyo daryeelka deegaamada. Si loogu guulaysto arintan, xirfadlayaashu waxay u baahan yihiin inay horumariyaan aqoonta, xirfadaha, awoodaha, iyo tayada oo kor u qaadaya horumarka wanaagsan iyo badqabka caruurta da'da dugsiga (da'aha 5-18). Dhukumentigani wuxuu dejinaya astaamaha iyo xirfadaha ugu muhiimsan, wuxuuna sharxayaax waxa xirfadlayaasha Washington u baahan yihiin inay ogaadaan oo ay sameeyaan si ay u bixin karaan barnaamij tayo leh. Iyadoo la dejinaayo xirfado dhowra, waxaan ku dhownahay hadafkeena casriyeeynta fursada waxbarasho ee la balaadhiyey.

MABAADII'DA NASHQADA

Xirfadlayaasha daryeelka caruurta da'da dugsiga iyo barnaamijyada waxbarashada la balaadhiyey badanka waxay hayaan doorar badan iyo shaqooyin qeybo kala duwan ah. Inkastoo tani jirto, shay ayey wada wadaagaan: waxay aamisan yihiin in caruurta iyo dhalinyaradu u baahan yihiin deegaan ka caawinaya inay horumaraan. Xirfadlayaashu waxay abuuraan goobo caruurta iyo dhalinyaradu ku dareemaan ixtiraam, ku arkaan qiimahooda, una mahadnaqaan qaninimada kala duwanaanshaha ay kusoo kordinayaan barnaamijka. Barnaamijyadu waxay sidoo kale fursad u leeyihii inay buuxiyaan gan-daloolada u dhaxeeyaa dugsiga iyo guriga, oo ay abuuraan shuraako qoys iyo bulsho oo caawinaya dhaqanka, caadada, baahiyaha bina'aadamka ee asaasiga ah, isla markaan xoojinaya khibradaha waxbarasho.

Xirfadlayaashu waxay si weyn u saameyn karaan horumarka canuga iyo dhalinyarada. Kartidan waxa lagu diyaariiyey aragtiyaha muhiimka iyo qiiimaha hubinaya in xirfadlayaashu yihiin shaqaale wanaagsan oo caawiya nolosha caruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska.

WAXAANU AAMISANAHAY IN:

- *Caruurta iyo dhalinyaradu yihiin bina'aadam ay tahay in lagula dhaqmo sharaf iyo cadaalad.*
- *Nidaam ku saleysan awood waa asaasiyaadka ugu adeegida caruurta, dhalinyarada iyo qoysaska si waxtar leh.*
- *Kajawaabis dhaqan oo daruuri u ah ugu adeegista caruurta iyo dhalinyarada si guud oo waxtar leh.*
- *Adeegyo tayo leh waa in ay ilaaliyaan baahiyaha shakhsiga maskaxda lagu hayo.*
- *Dhammaan xirfadlayaashu waxay u baahan yihiin inay wakhti u sameeyaan si ay uga turjumaan waxna uga bartaan nidaamkooda.*

GUUDMARKA QEYBAHA TUSMADA

Waxa jira toban qeybood oo tusmada dhukumentigan ku jira. Qeybaha tusmada waxa loogu talagalay inay kasoo wada dhex muuqdaan dhinacyada isirka, luuqada, iyo asalo dhaqan-dhaqaale ee kala duwan, iyo sidoo kale shakhsiyaad leh naafu jidheed, korniin, ama awoodo maskaxeed oo kala gedisan. Waxa jirta qeyb loo asteeeyey tusmada sinaanta isirka iyo kajawaabista dhaqanka. Dhinac la dagaalanka takoorka iyo isir naceybku sidoo kale waxa lagu daray dhammaan qeybaha tusmada. Tusmooyinka dhawr ah waa kuwo waawayn oo waxa kujira qaybo hoosaadyo si sifican loogu habeeyo tusiyaasha.

| TUSMADA | QEYB-HOOSAADYO |
|---|---|
|  Sinaanta Jinsiga iyo Kajawaabista Dhaqanka | |
|  Badqabka iyo Caafimaadka | <ol style="list-style-type: none"> 1. Badqabka Deegaanka 2. Caafimaadka |
|  Korniinka iyo Horumarka | |
|  Barashada Deegaanka iyo Manhajka | <ol style="list-style-type: none"> 1. Abuurista Deegaan Waxbarasho iyo Manhajka Guud 2. Kor u Qaadista Horumarka Jidhka, Bulshada, iyo Maskaxda 3. Kor u Qaadista Qoraalka: Xirfadaha Xidhiidhka iyo Hal-abuurka |
|  Isdhixgalka | <ol style="list-style-type: none"> 1. Siinta Hagaha Gaarka ah 2. Kor u Qaadida Khibradaha Kooxaha |
|  Horumarinta Dhalinyarada | |
|  Indho-indhaynta iyo Qiimaynta | |
|  Qoysaska, Bulshooyinka, iyo Dugsiyada | <ol style="list-style-type: none"> 1. Xidhiidhada Qoysaska 2. Shuraakada Bulshada 3. Shuraakada Dugsiyada lala Leeyahay |
|  Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka | <ol style="list-style-type: none"> 1. Qorsheynta iyo Qiimeynta Barnaamijka 2. Maamulka Shaqaalaha iyo Maaliyada |
|  Horumarinta Xirfadha iyo Hogaaminta | <ol style="list-style-type: none"> 1. Ka go'onaanshaha iyo Ixtiraamo Barnaamijka iyo Saamileyda 2. Kobaca Xirfad ee Soconaya 3. Hogaaminta iyo Olaleynta |

AKHRINTA KARTIDA MUHIIMKA AH

Marka naftaadu laqabsato sida xirfadaha loo habeeyo, waxay kuu noqon doontaa mid fudud inaad isticmaasho dhokumantigan. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa sida loo akhriyo tusmada xirfadaha muhiimka ah iyo qaybo hoosaadyada. Mid kasta waxaad ka raadin doontaa qaybta sharaxaada taasoo muujinaysa muhiimada iyo ujeedka, iyo tusiyaasha qeexaya aqoonta, xirfadaha, iyo awoodaha saddexda heer ee kala duwan. Tani waa tusaale muujinaya sida xirfdaha muhiimka ah loo habeeyo:

Tusmada: Qaybta balaadhan ee kooxdan kartida ah



QAYB HOOSAADKA QAYBTAN KARTIDA, HADDII AY KU HABOON TAHAY


| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|--|---|
| A. Wawa muujiya qof soo galaya shaqaalaha ama meesha ku cusub | A. Wawa muujiya qof haysta xoogaa khibrad ah | A. Wawa muujiya qof haysta khibrad sare |

Tilmaamayaal

- Su'aalaha muhiimka ah ee aad waydiinayso naftaada sida kartida loogu dabaqayo shaqadaada

HEERARKA

Heerarka xirfaduhu waxay ku bilowdaan aqoonta aasaasiga ah iyo xirfadaha waxayna noqdaan kuwo aad u horumarsan heer kasta, laga soo bilaabo Dhaqan Soo Baxaya, Dhaqan Hirgalaya, iyo Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo. Xirfadlayaashu waxay leeyihiiin waayo-aragnimo kala duwan, waxaan laga yaabaa inay arkaan iyaga oo Soo Baxaya ama Hirgalaya qaybaha qaar, oo ku Sii Qoto Dheeraanayo meelaha kale. Hadafku waa in la arko shakhsiyadka ka gudbaya heer ilaa heer kale iyada oo loo marayo khibrad, tababar, waxbarasho rasmi ah, hagid, iyo/ama dib u eegis.





Isticmaalka Kartida Muhiimka ah

Balaadhinta fursadaha waxbarasho ee shaqaalaha, shaqaalaysiyyaasha, iyo maalgeliyayaasha ayaa laga yaabaa inay isticmaalaan xirfadaha muhiimka ah si ay u taageeraan hawsha shaqsiga, hagaha barnaamijka qorshaynta horumarinta xirfadeed, una sheegaan horumarinta fursadaha waxbarasho ee cusub. Fiiri shaxda hoose si aad fikrado uga hesho sida aad ugu isticmaali karto noloshaada xirfadeed:

| DOORKA | SIDA AAD U ISTICMAALI KARTO KARTIDA MUHIIMKA AH? |
|---|--|
| Daryeel bixiyaasha tooska ah | <ul style="list-style-type: none"> Qiimee heerka aqoonta iyo xirfada kujira qaybta tusmada Aqoonso meelaha aad ku wanaagsan tahay iyo meelaha aad ku sarayso Aqoonso meelaha ay horumarka xooga ahi kajiro |
| Agaasimayaasha Maamulayaasha Barnaamijka | <ul style="list-style-type: none"> Samee qorshaynta horumarinta xirfadeed iyo siyaasado Samee waxyaabaha uu shaqaaluhu qabanayo Asaas shuruudaha horumarinta xirfadaha Samee cabir mushahar oo ku salaysan guu gaadhista, khibrada, waxbarashada |
| Qoysaska/Daryeel bixiyaasha Shuraakada Bulshada Dugsiyada Dadweynaha (K-12) | <ul style="list-style-type: none"> Wax ka baro waxyaabaha laga filayo xirfadlayaasha waxbarashada ee la balaadhiyay |
| Tabobarayaasha Ururada Tababarka | <ul style="list-style-type: none"> Samee tababar iyo horumarinta kale ee shaqaalaha Sii fursado waxbarasho la xidhiidha oo saamayn kuleh |

SHAQAALEYSIINTA IYO SOO-DHAWEYNTA SHAQAALAHU CUSUB

Kartida muhiimka ahi waxay qabtaan aqoonta lagama maarmaanka ah, xirfadaha, iyo dhaqamada lagama maarmaanka u ah si loo taageero carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaskooda. Maamulayaasha barnaamiju waxay u isticmaali karaan xirfada iyo tilmaamayaasha hage ahaan marka ay:

- Samaynayaan waxyaabaha lagarabo shaqada goob cusub ama hore u jirtay
- Samaynayaan su'aalo waraysi
- Qiimaynta waxqabadka nashqadaynta

CAAWINTA HORUMARKA XIRFADA SHAKHSIGA

Waxaan ku dhiirigelinaynaa dhammaan xirfadlayaasha inay ku lug yeeshaan dib u eegista kobaca xirfadda. Is-qiimaynta (ka eeg Tusmada B) waxay ka caawin kartaa xirfadlayaasha inay go'aan ka gaadhaan sida si kutalagal ah diiradda loogu saaro horumarinta xirfadahooda. Xirfadlaха waxaa laga yaabaa inuu isticmaalo aragtiyo laga soo aruuriyay is-qiimeyeenta si uu u codsado taageerada waxbarashada.

Waxay ku xidhan tahay go'aanka qofka si uu u go'aansado sida loo dhamaystirayo is-qiimaynta. Tusaale ahaan, xirfad-yaqaanku waxa uu dooran karaa in uu diiradda saaro hal ama laba goobood ee xirfadaha hal mar iyo ka shaqaynta dhammaan goobaha isku mar.

Kartida muhiimka ahi waxay u shaqeeyaan qaab-dhismeedka is-qiimaynta iyo sidoo kale tababarida kormeerayaasha iyo la-taliyeyaal. Looguma talagalin in loo isticmaalo tilmaameyaal indho-indhayn ah, inkastoo ay u shaqayn karaan hage waxtar leh marka laga hadlayo wada-hadallada ku saabsan waxqabadka shaqaalaha. Xirfadlayaashu waxay isticmaali karaan Qalabka Is-qiimaynta Kartida Muhiimka ah jal ama laba jeer sannadkii iyagoo isticmaalaya dhammaan qaab-dhismeedka xirfada ama hal qayb oo kamid ah bishiiba inta lagu jiro sannadka. Sidoo kale, kormeerayaashu waxay isticmaali karaan qaab-dhismeedka si ay u hagaan falanqaynaha waxqabadka sannadlaha ah ama inay bixiyaan tababar ku saabsan xirfadaha shakhsii ahaaneed si joogto ah.

KARTIDA MUHIIMKA AH IYO TAYADA BARNAAMIJKAA

Isticmaalka kartida muhiimka ah si loo fahmo oo si joogto ah loo wanaajiyoo ku dhaqanka xubnaha shaqaalaha ayaa kaabaya isticmaalka qalabka tayada barnaamijka si loo horumariyo natijjooyinka barnaamijka. Dhab ahaantii, labada hab waa in la wada isticmaali karaa oo waana in si wadajir ah loo isticmaalaa. Barnamijyada isticmaalaya Program Quality Assessments (Qiimaynaha Tayada Barnaamijka, PQA) ee Xarunta Weiker waxay aqoonsan doonaan habaynta u dhaxaysa laba qalab. In kasta oo Kartida Muhiimka ah ee Washington ee Xannaanada Ilmaha ee da'da dugsiga ay yihiin kuwo balaadhan, qaybaha ayaa la jaan qaadaya gaar ahaan dhinacyada jawiga waxbarashada, korriinka carruurta, isdhexgalka dhalinyarada, iyo awoodsiinta dhalinyarada. Waxaa muhiim ah in la ogaado in qalabka PQA loogu talagalay in ay dhaliyaan natijjooyin sax ah oo ku salaysan indho-indhayn, halka xirfadu ay tahay qaab hagitaan ah oo lagu wado hawsha (laakiin looma qorshayn inay noqdaan qalab indho-indhayn ah).

Fikradaha isticmaalka dhammaystirka kartida muhiimka ah ee leh qaabka tayada barnaamijka waxaa ka mid ah:

- Isticmaalka kartida si loo aqoonsado shaqaalaha ku fiican xirfadaha la xidhiidha tayada barnaamijka (tusaale, abuurista jawi waxbarasho oo badbaado leh) iyo in lagu hogamiyo tababaro ama hagitaan shaqaale kale;
- Taageerida shaqaalaha si ay u dejyaan yoolalka kobaca shaqaalaha ee ku xusan tusmada lana jaan qaadaya dhinacyada tayada barnaamijka ee u baahan hagaajin;
- Diirada saarista tayada barnaamijka iyo himilooyinka xirfada shaqaalaha ee la jaanqaadaya bil kasta (tusaale, shaqaale gaar ah oo diirada saaraya xirfada Badbaadada Deegaanka iyo shirarka kooxda ee diirada saaraya tilmaamayaasha tayada Healthy Environment program (Barnaamijka Deegaanka caafimaadka leh)).



TALO: Haddii barnaamijkaagu u isticmaalayo Kartida Muhiimka ah si uu u qiimeeyo meelaha ay ka midka yihiin Barashada Deegaanka iyo Manhajka iyo Kor u qaadida Horumarinta Jidheed, Bulsheed, iyo Garasheed, waxaanu si adag kuugu dhiirigelinay inaad waydiiso dhalinyarada fikrado ku saabsan meelahan. Fursadan codka dhalinyaradu waxa ay u adeegtaa laba ujeedo oo ah in la helo jawaab celin toos ah si loo hubiyo koboc xirfadeed iyadoo la siinayo dhalinyarada fursad ay ku qaabeeyaan barnaamijka. Iyadoo ku xiran kooxda iyo cilaaqaadka, tixgeli wada hadal toos ah ama sahan qarsoodi ah.



Gunaanadka

Waxaan ku dhiirigelinaynaa dhammaan xirfadlayaasha inay wadaagaan waayo-aragnimadooda oo ay ka qaybqaataan qorshe iskaashi si ay u horumariyaan taageerooyin waxtar leh, loo siman yahay, oo dhaqan ahaan ka jawaabaya kuwa la shaqeeya carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska. Kheyraadkan waxaa loo sameeyay inay noqoto dhokumanti jira. Waxay mari doontaa dib u eegis muddaysan oo ku salaysan

cilmi-baadhis iyo horumarro laga sameeyay goobta, jawaab-celinta isticmaalyaasha, iyo isbeddellada heerka-nidaamyada kale ee Gobolka Washington. Haddii aad hayso wax fikrad ah oo ku saabsan sida loo wanaajin karo isticmaalka iyo shaqada dhokumantigan, kala xidhiidh DCYF training@dcyf.wa.gov si aad ula wadaagto faalooyinkaas qiimaha leh. Siwadajir ah waxaan u dhisi karnaa nidaam wanaagsan oo taageero!



SINAANTA JINSIGA IYO KAJAWAABISTA DHAQANKA

I. SINAANTA JINSIGA IYO KAJAWAABISTA DHAQANKA

Faham sinnaanta iyo kala duwanaanshaha gudaha iyo dhaqamada oo dhan oo sii deegaan wax walba leh, soo dhawayn leh, iyo ixtiraam leh halkas oo dhammaan carruurta, dhalinyarada, iyo qoysasku ay ku muujin karaan ku muhiimada aqoonsigooda dhaqan, caqido, iyo dhaqan. Dadka leh mudnaan iyo awood dheeraad ah waxay kordhiyeyen fursadaha ay wax kaga qabtaan sinnaan-la'aanta bulsheed ee gudaha iyo dibadda shirkada oo leh khataro yar, waxayna kordhiyeyen mas'uuliyadda ka faa'iidaysiga fursadahaas. Tusiyaashu waxay ku haboon yihiin dhamaan shaqsiyadka guud ahaan heer kasta oo shirkada ah.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|---|--|
| <p>A. Wuxuu aqoonsadaa sida qofka isirkiisa, qowmiyaddiisa, hiddaha dhaqanka, luqadda/dadka, iyo aqoonsiga bulsheed iyo dhaqameed uu u heli karo mudnaan iyo/ama takoorid.</p> <p>B. Waxay siisaa jawi loo dhan yahay, soo dhawayn leh, oo ixtiraam leh dhammaan carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska.</p> <p>C. Waxay u abuurtaa jawi badbaado leh carruurta iyo dhallinyarada si ay u ogaadaan aqoonsigooda, oo ay ku jiraan caqidooyinka iyo arimaha dhaqameed.</p> <p>D. Waxay adeegsadaan agabka iyo dhaqamada ka tarjumaya oo qiimeeyaa dhammaan jinsiyadaha, qowmiyadaha, jinsiga, dhaqamada, qoysaska, diimaha, wacyigalinta galmeda, luqadaha, iyo awoodaha jireed iyo korriin.</p> <p>E. Wuxuu wax ka bartaa dhaqamada aduunka, oo ay ku jiraan qaybo la xidhiidha oogada, gacmeed, iyo dhaqanka qoto dheer¹.</p> | <p>A. Waxay si qotodheer uga fakartaa xaaladaha dhaqan ahaan adag wuxuuna ka qayb qaataa wadahadal ku saabsan mudnaanta iyo dulmiga.</p> <p>B. Wuxuu abuuuraa deegaan ay carruurta iyo dhallinyaradu ku muujijyaan hanweynaanta aqoonsiga dhaqameed, waxay aaminsan yihiin, iyo ku-dhaqankooda.</p> <p>C. Wuxuu xushmad u muujinayaan aqoonsiyada dhaqamada caruruut ay isku faca yihiin.</p> <p>D. Wuxuu qaabeeyaa fursadaha waxbarasho ee ka tarjumaya dhaqamada bulshada dhexdeeda iyo kala duwanaanshaha bulshada.</p> <p>E. Wuxuu aqoonsadaa sida mudnaanta iyo caddadisku u saameeyaan isdhixgalka carruurta, dhalinyarada, qoysaska, iyo bulshada.</p> | <p>A. Wuxuu dhisaa iskaashiyo lala yeesho ururo bulsho oo dhaqan-gaar ah iyo kuwa kale ee la xidhiidha.</p> <p>B. Wuxuu falanqeeyaa dhaqanka shirkada, siyaasadaha iyo nidaamyada wuxuuna fuliyaa isbeddelada kobciya dhaqamada ka jawaabaya sinnaanta iyo dhaqanka.</p> <p>C. U dooda tababbarka socda si ay u qoto dheereeyaan barashada iyo falanqaynta nidaamyada la xidhiidha sinnaanta jinsiyadda, mudnaanta, iyo dulmiga naftooda, shaqaalaha, iyo ka qaybgalayaasha barnaamijka.</p> <p>D. Ka qaybqataa ficiilka wada shaqynta iyo u doodista si loo beddelo nidaamyada maxalliga ah iyo kuwa qaranka ee ku wajahan sinnaanta jinsiyadda iyo caddaaladda bulshada.</p> |

Tixgelinada

- Sideen u ogaan karaa aqoonsigayga si aan si fiican u fahmo sida aan u arko oo aan ula macaamilo carruurta, qoysaska, iyo shuraakada?
- Sideen ugu tusi karaa carruurta iyo qoysaska inaan qiimaynayo aqoonsigooda dhaqan?
- Maxaa isbeddel ah oo aan ku samayn karaa goobta barnaamijkayga si aan u noqdo mid dhaqan ahaan koobsaday oo aan uga jawaabayaa aqoonsiga carruurta iyo dhalinyarada ee barnaamijkayga?

1. Dusha sare, gudaha, iyo dhaqanka qoto dheer waa qaybo ka mid ah qaabka Geedka Dhaqanka ee ay samaysay Zareeta Hammond.



BADQABKA IYO CAAFIMAADKA

II-1. BADQABKA DEEGAANKA

Xirfadlayaasha waxaa laga filayaa inay dhisaan oo ay ilaaliyaan deegaan hubinaya horumarka jidheed ee caafimaadka carruurta iyo dhalinyarada, badqabka, iyo nafaqada.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|--|--|
| <p>A. Waxay doorataa oo ay u ilaalisaa agabka iyo qalabka marka lajoogo dibada iyo gudahaba.</p> <p>B. Si firfircoon u kormeera oo u dhegalaa carruurta iyo dhalinyarada si loo hubiyo badbaadada inta lagu jiro dhammaan hawlaas.</p> <p>C. Waxay ilaalisaa deegaan caafimaad qaba iyadoo la raacayo nidaamyada caafimaad, badqab iyo nadaafadeed.</p> <p>D. Waxay maamushaa xaaladaha saameyn kara shakhsiyadka qaba xasaasiyadda, xiiqda, ama tabashooyinka kale ee caafimaadka.</p> <p>E. Waxay fahmaysaa siyaasadaha gaadiidka iyo habraacyada barnaamijka.</p> | <p>A. Wawa uu laqabsadaa deegaanka gudaha iyo dibadda si loo kordhiyo madax-banaanida carruurta iyo dhalinyarta baahiyaha gaarka ah qabta.</p> <p>B. Wuxuu abuuraa deegaan lagula xisaabtamayo taxaddarrada iyo xeeraka badbaadada.</p> <p>C. Waxay ka codsataa jawaab celinta carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska si loo aqoonsado loona hagaajijo arrimaha badbaadada deegaanka.</p> <p>D. La wadaaga macluumaadka iyo agabka badbaadada ugu dambeeyay ee qoysaska iyo shaqaalaha.</p> <p>E. Waxay ku haboontayah nidaamyada badqabka si loo hubiyo in safarada dibadu yihii kuwo badqaba.</p> | <p>A. Kala taliyaa badqabka deegaanka ee dhamaan barnaamijyada iyo hawlahaa.</p> <p>B. Waxay horumarisaa, dib u eegis, iyo/ama dib u eegtaa siyaasadaha iyo habraacyada badbaadada deegaanka ee ku salaysan cilmi baadhista hadda jirta.</p> <p>C. Wuxuu tababaraa shaqaalaha iyo/ama mutadawiciinta ku saabsan siyaasadaha iyo nidaamyada badqabka barnaamijka.</p> |

Tixgelinada

- Sidee baa badbaadada deegaanka loogu waafajin karaa carruurta iyo dhallinyarada leh awoodo, baahiyoo iyo awoodo kala duwan?
- Sideed u dhisi kartaa jadwal joogto ah si aad u hubiso meelaha barnaamijkaaga khataraha badbaadada deegaanka si joogto ah uga gaysto?
- Sideed ku hubin kartaa in shaqaluhu ay meeleyaan inta uu socdo barnaamijka si dhammaan carruurta si firfircoon loo kormeero?

Ogow: Dhammaan xirfadlayaasha da'da dugsiga waa inay yaqaanaan oo waa inay la xidhiidhaan badbaadada iyo fayoobaanta iyadoo la raacayo da'da dugsiga WACs, halkan kahel: www.dcfy.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider-school-age-providers/wac.

II-2. CAAFIMAADKA

Sii barnaamij deegaan kaasoo taageeraya fayoobaanta dhamaan caruurta iyo dhalinyarta. World Health Organization (Ururka Qaramada Midoobay u Qaabilsan Caafimaadka) waxa uu ku qeexay fayoobaanta sida "xaalad ladnaan jidheed, maskaxeed iyo bulsheed oo dhamaystiran ee maaha kaliya maqnaanshaha cudur ama jirro."

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|---|---|
| <p>A. Wuxuu muujiyaa nadaafadda saxda ah iyo hababka fayadhowrka, oo ay ku jiraan farsamooyinka gacmo-dhaqashada iyo hab-dhaqannada badbaadada leh ee maaraynta cuntada.</p> <p>B. Wuxuu ka jawaabaa oo uu diiwaangeliyaa dhaawacyada, oo uu maalin kasta la socda carruurta iyo dhalinyarada leh calaamadaha xanuunka iyo/ama calaamadaha xadgudubka iyo dayaca.</p> <p>C. Wuxuu sameeyaa dhaqdhaqaqyo jidheed oo kala duwan oo buuxiya danaha, heerarka korriinka, iyo xirfadaha carruurta iyo dhalinyarada.</p> <p>D. Waxay muujisaa ka warqabka arrimaha khatarta ah iyo doorashooyinka nolosha caafimaadka ee khuseeya nafaqada, caafimaadka jidhka iyo maskaxda, dhaqdhaqaqa jidhka, iyo xidhiidhada caafimaadka qaba.</p> <p>E. Wuxuu raacaa tilmaamaha maamulka daawada iyo daawaynta la oggolaaday, oo ay ku jiraan dhukumentiyada la xidhiidha.</p> | <p>A. Waxay baraysaa carruurta iyo dhalinyarada habraacyada nadaafadda iyo fayadhowrka ku habboon.</p> <p>B. Waxay ku hawlgelisa carruurta/ dhalinyarada falanqaynahu ku habboon da'da ee horumarka aadanaha iyo mowduucyo nololeed ee caafimaad qabka, oo uga jawaaba su'alaha macluumaad sax ah oo cilmi-baadhis ku salaysan.</p> <p>C. Wuxuu kala hadlaa carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska waxa ku jira nafaqada cuntada iyo baahiyaha nafaqeynta.</p> <p>D. Waxay ka jawaabtaa dookhyada cuntada shahsiga iyo kuwa dhaqameed.</p> <p>E. Wuxuu caawiyyaa carruurta, dhalinyarada, qoysaska, shaqaalaha, iyo kuwa kale inay aqoonsadaan oo ay ka warbixiyaan xadgudubka iyo dayaca.</p> <p>F. Wuxuu qaabeeyaa oo uu hirgaliyaa hawlaха xooga lagu saarayo jidhka caafimaadka qaba, qaab nololeed caafimaad leh, dhaqdhaqaq jidheed, iyo deegaan caafimaad qaba.</p> | <p>A. Wuxuu qorsheeyaa oo uu qiimeeyaa waxyabaha ka jawaabaya nafaqada iyo baahiyada dhaqan.</p> <p>B. Dejiya siyaasadaha iyo hababka caddaynta ku salaysan ee la xidhiidha fayadhowrka, badbaadada, aqoonsiga iyo ka hortagga xadgudubka, nolol caafimaad leh, iyo mawduucyada la xidhiidha.</p> <p>C. Waxay kala shaqeysaa xirfadlayaasha daryelka caafimaadka bulshada si ay wax uga qabtaan baahiyaha caafimaad ee caruurta iyo dhalinyarada.</p> <p>D. Wuxuu ka tababaraa shaqaalaha cabirada caafimaadka ee saameynaya guusha caruurta iyo dhalinyarada.</p> <p>E. Wuxuu isticmaalaa aragtiyaha hadda iyo cilmi-baadhisti nafaqada, hawlaho jimicsiga, caafimaadka maskaxda, caafimaadka galmaida iyo tarranka, jinsiga, iyo latalinta tarranka ee siyaasadaha ururka, barnaamijyada, iyo xeerarka.</p> |

Tixgelinada

- Sidee ayaad u qiimysaa caadooyinka dhaqanka caruurta ee la xidhiidha nafaqada iyo caafimaadka intay baranayaan xeerarka iyo caadooyinka cusub?
- Sidee ayaad u hubinaysaa in diwaanada iyo qoraalku yaalaan meelo la heli karo oo dhammaan shaqaaluhu ka warhayaan?
- Sidee ayaad u tixgalinaysaa oo aad u sharfaysaa fikirka iyo aqoonsiga jinsiga dadka yaryar marka la dejinaayo siyaasadaha iyo xeerarka barnaamijkaaga?



KORNIINKA IYO HORUMARKA

III. KORNIINKA IYO HORUMARKA

Xirfadlayaasha waxa laga filayaa inay fahmaan sida caruurta iyo dhalinyaradu u bartaan, u horumariyaan, una helaan fikirada luuqada iyo hal-abuurka ee qeyb kasta oo ka mida: jidhka, bulshada, dareenka, iyo maskaxda.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|--|--|
| A. Waxay tilmaamaysaa heerarka aqoonta jidheed, maskaxeed, bulsheed, iyo dareen ee horumarka canuga iyo dhalinyarada. B. Waxay aqoonsanayaan in caruurtu iyo dhalinyaradu ay bartaan oo ay ku kobcaan waayo-aragnimo. C. Waxay ka jawaabaysaa baahiyaha gaarka ah ee caruurta iyo dhalinyarada, oo ay ku jiraan kuwa baahiyaha gaarka ah leh. D. Waxay u aqoonsanaysaa qaabab dhaqanku saameyn karo hab-dhaqanka iyo korniinka. | A. Waxay qiimaynaysaa kala duwanaanshaha gaarka waxayna ka faa'idsanaysaa qaab haboon oo si joogto ah wax looga badelaayo baahiyaha, daneysa, hantida, iyo awoodaha caruurta iyo dhalinyarada. B. Waxay aqoonsanaysaa qdoboda halista ah ee macquulka ah, dibudhaca, ama naafoojinka tilmaami kara baahida adeegyo gaara, wax ka badelka barnaamijka, iyo/ama latashiga kormeeraha. C. Waxay abuuraysaa deegaano iyo khibrado intiraamaya oo xaqqijinaya kala duwanaanshaha dhaqanka, isirka, luuqada, jinsiga, iyo dhaqaalaha bulshada. | A. Wuxuu ka tabobarayaa shaqaalahaa aragtiyaha hadda iyo cilmi-baadhistaa korniinka canuga iyo barbaarta si loo taageero xeerarka ugu fican ee barnaamijka. B. Wuxuu kasoo ururinayaa xogta ilo kala duwan si loo taageero qiimeynta iyo horumarinta barnaamijka iyo xeerarka ururka. C. Wuxuu dib u eegayaa oo maamulayaa siyaasadaha iyo xeerarka barnaamijka si loo hubiyo inay caawinayaan oo ay waafaqsan yihiin horumarka caruurta iyo dhalinyarada loo adeegay. |

Tixgelinada

- Sidee ayey korniinka iyo horumarku khaas u noqonayaan iyadoo lagu saleynayo aqoonsiga ardeyda?
- Sidee ayuu dhaqanku u saameynaya qaabka iyo sida canugu u muujinaayo hab-dhaqan kuhaboon da'da?
- Sidee ayaad wax uga badelaysaa fahamkaaga korniinka iyo horumarka markaad la shaqeynaysid caruurta qabta baahiyaha gaarka ah?



BARASHADA DEEGAANKA IYO MANHAJKA

IV-1. ABUURISTA DEEGAAN WAXBARASHO IYO MANHAJKA GUUD

Samee deegaan siinaya khibrado waxbaasho iyo manhaj si loo daboolo baahiyaha, kartida iyo daneynta caruurta iyo dhalinyarada.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|---|---|
| <p>A. Wuxuu tilmaamayaa aqoonta sida bay'ada/deegaanku u saameyn karto waxtarka waxdhigista iyo waxbarashada.</p> <p>B. Wuxuu aqoonsanayaa in caruurta iyo dhalinyaradu si fiican ugu bartaan khibrado haboon oo muuqda.</p> <p>C. Wuxuu dhisayaa qorshayaasha iyo/ ama qorsheyneyaa hawlahu ku saleysan heerarka waxbarasho.</p> <p>D. Wuxuu ilaalinayaa jadwal joogto ah oo dheeli-tiriya hawlo firfircooni iyo deganaan leh, dhalinyaro iyo waayeel quman, shakhsiyad iyo kooxo, iyo gudo iyo dibada leh.</p> <p>E. Wuxuu hubinayaa inay jiraan agab ku filan, korniin ahaan ku haboon, oo dhaqan ahaan waxtarleh bilowga hawl kasta.</p> | <p>A. Wuxuu siinayaa caruurta iyo dhalinyarada fursado ka turjumaya khibrado, sameynayaa qorshayaalaa, ama u dejinayaa hadafyo mudada gaaban/dheer ah.</p> <p>B. Wuxuu siinayaa deegaan badqab u leh jidh ahaan iyo maskax ahaanba oo u sahlaya barashada dhammaan qeybaha manhajka.</p> <p>C. Wuxuu si cad u siinayaa fursado caruurta iyo dhalinyaradu ku sameyaan doorashada hawlahu ku helaan doorar hogamin barnaamijka gudhiisa.</p> <p>D. Wuxuu siinayaa hawl u saamaxaya caruurta iyo dhalinyaradu inay isticmaalaan agabka ama fikradaha iyagoo raacaya xeerarka.</p> <p>E. Wuxuu abuurayaa deegaan caawinaya waxbarashada jirta oo ay ku jiraan hawlahu isku dheeli-tiraya aragtiyaha xaqiiqda ah ee waayo-aragnimada wata.</p> | <p>A. Wuxuu kala macaamilayaa shaqaalaha, caruurta/dhalinyarada, iyo qoysasku inay qiimeeyaan deegaanka waxbarasho iyo manhajka dhammaan caruurta iyo dhalinyarada.</p> <p>B. Wuxuu isticmaalayaa cilmi-baadhistaa hadda si loo nashaqadeeyo, dib loogu eego, loona horumriyo manhajka iyo deegaanka waxbarasho si loo gaadho heerarka, awoodaha iyo baahiyaha waxbarasho ee dhammaan caruurta/dhalinyarada.</p> <p>C. Wuxuu ka taageerayaa shaqaalaha/kooxa macalimiinta ah nashqada manhajka.</p> <p>D. Wuxuu kala shaqeynayaa wakaaladaha inay kordhiyaan fursadaha waxbarasho ee qeybo manhajka ah.</p> <p>E. Wuxuu qiimeyeeyayaa manhajka si loo hubiyo in uu wax ka qabanayo heerarka waxbarasho ee qeybaha tusmada (tusaale, sayniska, xisaabta, farshaxanka, iwm.).</p> |

Tixgelinada

- Sidee ayaad uga dhigtaa qodobkasta oo deegaanka waxbarashada tooska ah mid dhaqan ahaan turjumaya oo matalaya bulshada?
- Sidee ayaad uga codsataa taageero uguna dartaa fikirkira dadka yaryar qorsheynta barnaamijkaaga?
- Tixgalino nooceee ah ayaad ku dheeli-tirtaa dejinta jadwalkaaga maalinlaha iyo todobaadlaha ah ee barnaamijka?



IV-2. KOR U QAADISTA HORUMARKA JIDHKA, BULSHADA, IYO MASKAXDA

Waxbarashadu waa mid bulsheed iyo dareen. Xirfadlayasha waxay u baahan yihiin inay ka faa'idaystaan siyaasadaha iyo xeerarka si ay caawiyaan barashada iyo dhisida xirfada ee dhammaan qeybaha: jidheed, bulsheed, dareen iyo maskaxeed.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|--|---|
| <p>A. Wuxuu sawir ka bixinaya fikirka iyo maamulka badqaba ee dareenka.</p> <p>B. Wuxuu weydiinaya caruurta iyo dhalinyarada su'aalo furan oo la xidhiidha waxbarashada la balaadhiyey.</p> <p>C. Wuxuu dhiirigalinaya horumarka maskaxeed, bulsho, dareen iyo jidheed ee caruurta iyo dhalinyarada iyadoo la marayo tijaabin, sahamin, sawirid iyo ciyaar.</p> <p>D. Wuxuu caawinaya in caruurta iyo dhalinyarada u wada shaqeeyaan kooxo waaweyn iyo kuwo yaryarba.</p> <p>E. Wuxuu siinaya fursado lagu dhisaayo naxariista iyo ixtiraamka caruurta, dhalinyarada, iyo dadka waaweyn dheddooda.</p> | <p>A. Wuxuu dib u qeegayaa hawlaho waxbarasho si loogu dhiso waxbarashadii hore, loo nadiifiyo fikirka, loona dhiso fikirka haboon iyo xirfada.</p> <p>B. Wuxuu ku darayaa hawlaho maskaxeed, bulsheed, iyo jidheed dhammaan qeybaha manhajka.</p> <p>C. Wuxuu siinaya tilmaam iyo taageero xalinta dhibaatooyinka iyo khilaafka ah.</p> <p>D. Wuxuu saxayaa siyaasadaha barnaamijka si loola macaamilo shakhsiyaa dano iyo awoodo kala duwan leh.</p> | <p>A. Wuxuu ku tabobarayaa shaqaalaha aragtiiyaha hadda iyo cilmi-baadhis si loo taageero fursadaha horumarka jidheed, maskaxeed iyo bulsho ee hawlaho barnaamijka.</p> <p>B. Wuxuu u ololeynaya siyaasado dhaqan ahaan haboon iyo xeerar kor u qaadaya horumarka jidheed, maskaxeed, iyo bulsheed.</p> <p>C. Wuxuu qiimeynaya tayada iyo wuxtarka manhajka, hawlaho, iyo fursadaha caawinaya horumarka jidheed, maskaxeed, iyo bulsheed.</p> |

Tixgelinada

- Sidee ayaa horumarka bulsheed wax looga badeli karaa iyadoo ku saleysan doorashada iyo hab-dhaqanada caruurta?
- Sidee ayaad iskugu dheeli-tirtaa horumarinta jidheed, bulsho, iyo maskaxeed iyo xirfada jadwalkaaga maalinlaha ama todobaadla?
- Sidee ayaad ugu tilmaamtaa dadka yaryar khilaaf?

IV-3. KOR U QAADISTA QORAALKA: XIRFADAHA XIDHIIDHKA IYO HAL-ABUURKA

Noocyada xidhiidha iyo hab fikirku badana waxay ku xidhan yihii taariikhda dadka. Xirfadlayaashu waa inay siyaan qaabab badan oo kala duwan caruurta iyo dhalinyarada si ay ugu gudbin karaan fikirkooda iyo danahooda, si qofkastaaba u helo qaab uu uga qeybgali karo.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|---|---|
| <p>A. Wuxuu sawir ka bixinaya dhageysiga fican iyo qaababkal xirfadaha kala duwan ee xidhiidha, oo ay ku jiraan noocyada hadalka iyo kuwa aan ahayn hadalka si loo sheego fikir iyo dareen.</p> <p>B. Wuxuu fahmayaan oo noocyada xidhiidhka iyo sharaxaadu kala duwan yihii iyagoo ku saleysan arimaha bulshada iyo dhaqanka.</p> <p>C. Wuxuu kor u qaadayaa siyaasadaha caruurta/dhalinyarada ee xalinta khilaafyada.</p> <p>D. Wuxuu siinaya fursado lagu balaadhinayo kalmadahaaga iyo kaqeybalaha.</p> <p>E. Wuxuu siinaya wakhti iyo hawlo aan cayneyn si loo dhiiri galiyo hal-abuurka iyo gaar ahaanshaha hadalka.</p> | <p>A. Wuxuu siinaya fursado kala duwan oo xidhiidha si loo daboolo danaha gaarka iyo heerarka xirfadaha ee caruurta iyo dhalinyarada.</p> <p>B. Wuxuu ku darayaa hawlaha hadalka iyo hal-abuurka ee ka turjumaya dhaqamo kala duwan.</p> <p>C. Wuxuu ugo dabaal degayaa hal-abuurka hadalka bandhigyo, ama kulamo dadweyne.</p> <p>D. Wuxuu uoleynaya muhiimada sharaxa hadalka, dareenka, iyo fikradaha iyadoo la marayo sharaxaado hal-abuur leh.</p> | <p>A. Wuxuu isticmaalayaa qalabka qiimeyeenta joogtada ah, dhaqan ahaan haboon si loo qiimeyeeyo xirfadaha xidhiidhka gaarka ah.</p> <p>B. Wuxuu qiimeyeeyaa haboonaanshaha iyo waxtarka hawlaha hal-abuurka ee kooxaha iyo shakhsiyadka.</p> <p>C. Wuxuu ka tabobarayaa shaqaalahaa aragtiyaha hadda iyo cilmi-baadhis ku sahabsan barashada luuqada, akhriska iyo qoraalka, wuxuuna kor u qaadayaa hal-abuurka si loo taageero qorsheynta barnaamijka iyo hawlaha.</p> <p>D. Wuxuu dhisayaa shuraakada xubnaha bulshada iyo ururada si loo balaadhiyo fahamka hal-abuurka hadalka iyo waayo-aragnimada.</p> |

Tixgelinada

- Waa maxay dhaqamada xidhiidhka ee dhalinyarada aad u shaqeysid? Ka waran shaqaalahaa? Kuwaahaga?
- Sidee ayaa hal-abuurka suugaantu u kala duwan yahay canug ka canug isagoo ku saleysan aqoonsigooda iyo dhaqankooda?





V-1. SIINTA HAGAHA GAARKA AH

Shaqaaluhu waa inay u diyaarsanaadaan inay ka caawiyaan caruurta iyo dhalinyarada inay xaliyaan khilaafaadka, qaladaadka, ama anshax-xumada, oo u badelaan furado waxbarasho. Siyaasadaha ay isticmaali doonaan waxay u baahan doonaan in gaar laga dhigo si uu heli karo canug iyo barbaarkastaaba.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|---|--|
| <p>A. Inta lagu jiro khilaafyada, wuxuu dhiirigalinaya weydiinta su'aalahfa hamka iyo dhageysiga firfircoon ee jawaabaha la bixiyey.</p> <p>B. Wuxuu la dhisayaa xidhiidho kalsooni leh caruurta iyo dhalinyarada kuwasoo siinaya kalsooni jidheed iyo shucuureed.</p> <p>C. Wuxuu fahmaya eexashada cad wuxuuna yareynaya eexashada qofka iyadoo la marayo lasocosho iyo waxbarasho joogto ah.</p> <p>D. Wuxuu raacayaa tilmaamo loo dejiyey kormeerka, hab-dhaqanka haboon, maamulka kooxaha, iyo xalinta khilaafaadka.</p> <p>E. Wuxuu muujinaya aqoonta sida hab-dhanadu uga turjumaan baahiyaha canuga/dhalinyarada.</p> | <p>A. Wuxuu isticmaalayaa habab tilmaamo wacan oo toos ah iyo kuwo dadbanba si hab waxtarleh looga jawaabo hab-dhaqanada.</p> <p>B. Wuxuu ka caawinaya caruurta iyo dhalinyaradu inay bartaan sida loogu sharaxo shucuurtta hab waxtar leh, loogu xaliyo dhibaatooyinka, loona sameeyo go'aamo madaxbanaan.</p> <p>C. Wuxuu dooranaya nidaamyo tilmaam ku saleysan shakhsiyada iyo heerarka horumarka ee caruurta iyo dhalinyarda.</p> <p>D. Wuxuu isticmaalayaa cilmiga aqoonsiga dhaqanka caruurta/dhalinyarada si loo taageero xalinta dhibaatada iyo khilaafka.</p> | <p>A. Wuxuu u tababarayaa shaqaalaha aragtiyaha korniinka iyo horumarka caruurta/barbaarta si loo horumariyo siyaasadaha tilmaamta.</p> <p>B. Wuxuu kala shaqeeyaa qoysaska iyo dugsiyadu inay horumariyaan rajooyinka korniinka haboon ee hab-dhaqanada.</p> <p>C. Wuxuu abuurayaa heshiis kooxeedyo qoran oo waadixa iyo nidaamyo xalin khilaaf.</p> <p>D. Wuxuu diyaarinaya qorshayaasha tilmaamta gaarka ah.</p> |

Tixgelinada

- Waa maxay xeerarka aad isticmaashaa si aad u hubisid inaad ku xidhnaatid dadka yaryar ee barnaamijaaga si maalinle ah koox shaqaale ahaan?
- Sidee ayaad uga shaqeynaysaa inaad fahamtid oo aad ilowdid eexashada aad leedahay?
- Siyaasadehee ayaad isticmaali kartaa si aad uga caawisid caruurta iyo dhalinyaradu inay bartaan inay fahmaan oo isticmaalaan shucuurtooda?



V-2. KOR U QAADIDA KHIBRADAH KOOXAHA

Khibradaha kooxhu waxay siinaysaa caruuerta iyo dhalinyarada fursad ay kaga doodaan, ku helaan aragti, tanaasul, iyo xalin dhibaato. Waxay sidoo kale ka caawin kartaa inay xoojiyaan xidhiidhada oo ay dhisaan xirfado bulsho oo qiimo leh kuwaasoo ka caawin doonaa deegaanka guriga, dugsiga, iyo shaqada.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|---|--|
| <p>A. Wuxuu hirgalinayaahawlahasi loohubiyoin dhammaan caruuerta iyo dhalinyaradukaqeybyihiin.</p> <p>B. Wuxuu siinayaajogteyniyadoo la raacayo jadwal la dejiyey oo looganawada xidhiidhayosi firfircoonisbadelka.</p> <p>C. Wuxuu siinayaatilmaamo waadixa oo hawlahayo isbadelada jadwalka ah.</p> <p>D. Wuxuu ka doodayaraajooyinka iyo xuduudaha kooxha si lootaageero deegaansoo-dhaweyn leh.</p> <p>E. Wuxuu isticmaalayaa nidaamyo tilmaamiyo xidhiidh dhisid lehsillogu dhaforcaruuerta iyo dhalinyarada dhammaanawoodahoodakoox.</p> | <p>A. Wuxuu siinayaakhibrado ka jawaabaya danahaguudecaruuerta iyo dhalinyarada.</p> <p>B. Wuxuu aqoonsanayaawoodahagaarkahasi looxoojiyo isbadelada oo korlooguqaadawada-shaqeynwaxbarasho.</p> <p>C. Wuxuu diyaarinayaahawlowada-shaqeynkooxeedoo dhisaya xirfadahadoodaha, tanaasulka, iyo xalinta khilaafadka.</p> <p>D. Wuxuu siinayaafursadocaruurta iyo dhalinyaradukaga wadashaqeynkaraanhadaf la wadaago oo ay kadhalaankaraanwaxyabo lataabankaro iy waxqabad.</p> <p>E. Wuxuu siinayaadeegaantaaageero leh ooka caawinaya horumarinta aqoonsigaiyakamidahaanshaha.</p> | <p>A. Wuxuu u sahlayaain caruurta iyo dhalinyaradudejjiyanertilmaamahabarnaamijka iyo qaab-dhsimeedyadakooxaha, dhaqamadabarnaamijka, iyroajooyinka.</p> <p>B. Wuxuu diyaarinayaahawlowadashaqeynkooxeedoo waafaqsancilmibaadhista hadda iyo/ama manhajkabarnaamijka.</p> <p>C. Wuxuu u tababarayashaqalaaharagtiyaha hadda iyo cilmi-baadhislagutaageeraayosiyaasado barnaamijyowadashaqeynbarnaamijyada.</p> |

Tixgelinada

- Siyaasado nooceehayaadisticmaalaysaa si aad ugu dhistid xidhiidhokooxeed qeybahakala duwan?
- Waa maxayaqababkaaad waxuga badeshidhawlahadhalinyaradabaahiyaha gaarkahaleh iyo/ama diyaargarowga?
- Sidee ayeylatahayoo maxayaugadhigan tahay caruuertuinay helaandareenkamidahaanshaha?



HORUMARINTA DHALINYARADA

VI. HORUMARINTA DHALINYARADA

Waxaanu rabnaa inaan hubino in dhammaan caruurta iyo dhalinyaradu helaan fursad ay ku horumariyaan isxakameyn, bartaan sida wax loo xaliyo, looguna celceliyo xirfadaha hogaaminta. Xirfadlayaashu waa inay u abuuraan fursado hogaanka, codka, iyo xoojinta dhalinyarada si ay u baran karaan sida loo saameeyo, dhiirigaliyo, ogeysiyo, ee loogu dhiiriyo ficiada.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|--|--|
| <p>A. Wuxuu qiimeeyaa waxtarka dhalinyarda wuxuuna siinaya fursado ay ku sameeyaa doorashooyinka barnaamijka.</p> <p>B. Wuxuu siinaya doorar hogaamin badan caruurta iyo dhalinyarada barnaamijka gudhiisa.</p> <p>C. Wuxuu u dabaal-degayaa guusha caruurta/dhalinyarada wuxuuna ku casuumayaa fursado ay wax kaga bartaan iskudaya iyo qaladaadka.</p> <p>D. Wuxuu siinaya deegaan ka caawinaya canug/barbaar kasta inuu ogaado, aqbalo, oo ku faano naftisa isla markaana horumariyo madaxbanaani.</p> <p>E. Wuxuu tilmaamayaa aqoonta wuxuuna aqoonsanayaa cadaadiska waalidka ee dhalinyarada ee siyaasada, xeerarka, ama hab-dhaqanada.</p> | <p>A. Wuxuu la wadaagayaa awood wuxuuna dhiirigalinaya hogaanka isagoo siinaya fursado loogu adeegayo bulshada laguna nashqadeynaayo barnaamijka dhalinyarada horkacayso.</p> <p>B. Wuxuu siinaya taageero iyo fursado hogaamin ah oo waafaqsan baahiyaha horumarineed.</p> <p>C. Wuxuu tilmaamayaa aqoonta dhaqanka iyo awooda dhalinyarada ee bulshada dhexdeeda.</p> <p>D. Wuxuu joojinayaa cadaadiska waayeelka ee dhalinyarada ee barnaamijka iyo hawlahaa.</p> | <p>A. Wuxuu barayaa caruurta iyo dhalinyarada xuquuqdooda sharciga ah.</p> <p>B. Wuxuu u ololeynayaa wadashaqeyn xoogan oo waalidka iyo dhalinyarada ah iyo muhiimada hal-abuurka.</p> <p>C. Wuxuu u tababarayaa shaqaalahaa aragtiyaha hadda, cilmi-baadhis, iyo xeerar lagu taageerayo xoojinta, hogaanka iyo codka dhalinyarada ee barnaamijka.</p> <p>D. Wuxuu abuurayaa siyaasado urur iyo nidaamyo lagu taageerayo kaeqeybgalka dhalinyarada.</p> <p>E. Wuxuu joojinayaa cadaadiska waalidka ee dhalinarada ee nidaamyada ururka iyo dibada.</p> |

Tixgelinada

- Miyaan u dhageysanayaa dhalinyarada si waxtarleh?
- Sidee ayaan ugu abuuraa fursado dhalinyarada si ay wax u hogaamiyaan iyadoo lagu saleynaayo dookhooda iyo nashqadooda?
- Sidee ayaad u hubisaa cadaadiska waalidka ee barnaamijkaaga?
- Sidee ayaad u hubin kartaa in dhammaan dhalinyaradu fursado u helaan hogaaminta?



VII. INDHO-INDHAYNTA IYO QIIMAYNTA

Carrurta iyo dhallinyaradu waxay ku koraan intay tahlayaan. Kormeer oo qiimee waxa caruurta iyo dhalinyaradu garanayo iyo waxa la samayn karo si loo qorsheeyo oo loosiyoo manhaj kaasoo buuxiya koritaankooda iyo baahiyahooda waxbarasho. Indho-indhaynta iyo qiimaynta waxa loo dhammaystiri karaa si rasmi ah iyo si aan rasmi ahayn. Qiimaynta aan rasmiga ahayn waxay u ekaan kartaa ka qayb qaadashada wadahadalada kooxaha shaqaalaha ee ku saabsan waxa aad ku aragto iyo maqashay hawlahaa. Qiimaynta rasmiga ah waxaa ka mid noqon kara isticmaalka khaaska ah, qalabyada cilmi-baadhistu ansaxisay ee jadwalka la dejiyay.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|---|---|
| A. Waxay ilaalisa sirta ku saabsan indho-indhaynta iyo macluumaadka qiimaynta. B. Wuxuu aqoonsadaa siyaabo lagu barto shaqsi kasta awoodiisa, baahidiisa, danaha, qoyska, iyo xaalada nololeed. C. Waxay u isticmaashaa qaabab kala duwan oo rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn, dhaqamo-la xidhiidha/indho-indhayn/nidaam qiimayn si aan eex lahayn. | A. Wuxuu la xidhiidha natijjooyinka indho-indhaynta iyo welwelka ku saabsan hab-dhaqanka iyo arrimaha deegaanka ee shakhsiyadka la oggol yahay. B. Waxay ka qaybelisaa dhalinyarada, shaqaalaha, iyo qoysaska nidaamka qiimaynta ee socda. C. Wuxuu tarjumaa macluumaadka indha-indheynta si loo horumariyo adeegyada, fursadaha, iyo taageerada caruurta iyo dhalinyarada. | A. Waxay la shaqeeyaan kooxaha qiimaynta, dugsiga, iyo caafimaadka ee caruurta iyo dhalinyarada baahiyaha gaarka ah qaba. B. Wuxuu ku tababaraa shaqaalaha xeeladaha cilmi-baadista ku saleysan si ay u taageeraan kormeerka iyo qiimeynnta. C. Wuxuu dejiya shuruudaha, nidaamyada, iyo hababka dhukumantiyada ee indho-indhaynta, qiimaynta, iyo hoyga. |

Tixgelinada

- Sidee baad u sahamin kartaa eexdaada ka hor inta aanad samayn indho-indhayn?
- Sidee ku ogaan kartaa marka aad isbedel ku samaynayso manhajkaaga ama goorta aad la qabsanayso hawlahaa si aad u dhiirigeliso horumarinta xirfada?
- Miyaad si joogto ah wakhti ula muddaysay kooxdaada shaqaalaha si aad ugala hadasho indho-indhaynta oo aad u samayso qorshayaal lagu taageerayo dhalinyarada?





QOYSASKA, BULSHOOYINKA, IYO DUGSIYADA

VIII-1. XIDHIIDHADA QOYSASKA

Xirfadlayaashu waa inay si wada jir ah ula shaqeeyaan qoysaska si ay u daboolaan baahiyaha carruurta iyo dhallinyarada, oo ay ku dhiirigeliyaan xidhiidhka qoyska ee barnamijka.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|--|---|
| <p>A. Aqoonsiga iyo qiimaynta isku midka ah iyo kala duwanaanshaha dhaqamada iyo qaababka kala duwan ee qoysaska.</p> <p>B. Adeegsada luuqad loo dhan yahay oo xusa dhammaan noocyada/qaab-dhismeedka qoyska, qiimeeyaa meelaha ay ku wanaagsan yihiin, oo ku daydo nidaamka qoys-ku-saleysan yahay.</p> <p>C. Wuxuu la shaqeynayaa qoysaska kasoo jeeda bulshooyin kala duwan dhaqan ahaan, luuqad ahaan, isir iyo dhaqaale bulsho ahaan.</p> <p>D. Wuxuu kala xidhiidhaa xubnaha qoyska wax ku saabsan hawlahaa barnamijka.</p> <p>E. Wuxuu aqoonsadaa saamaynta dhaqanka, luqada, qoomiyada, iyo kala duwanaanta dhaqan-dhaqaale ee ka dhextiri kara guriga iyo goobta barnamijka.</p> | <p>A. Waxay dhistaa xidhiidho taageero qoysaska waxayna ilaalisaa sirta ku saabsan su'aalaha, codsiyada, caqabadaha, ama faahfaahinta shakhsiyed marka laga reebo sida uu sharciyu farayo.</p> <p>B. Waxay hubisaa kala duwanaanshaha qoysaka iyo dhaqamada bulshada inay ka muuqdaan dhammaan qaybaha barnamijka.</p> <p>C. Waxay ku casuuntaa qoysaska inay wadaagaan xirfadaha, iyo arimaha dhaqanka iyagoo ka qayb qaadanaya hawlahaa barnamijka.</p> <p>D. Wuxuu fududeeyaa fursadaha horumarinta shabakadaha bulshada iyo taageerada qoysaska.</p> <p>E. Wuxuu nidaamiyaa hab ku salaysan awooda, qoyska-xuddun u ah si ay u taageeran cilaqaadka wanaagsan ee u dhexeeyaa carruurta iyo dhalinyarada iyo qoysaskooda.</p> | <p>A. Wuxuu qiimeeyaa barnamijka si loo hubiyo inuu qiimeeyo, soo dhaweyeo, oo ilaaliyo dhaqamada, caadooyinka, caqidooyinka, iyo dhaqamada carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska.</p> <p>B. Ka qayb galka horumarinta barnamijka qoysaska/siyaasadda iyo qiimaynta.</p> <p>C. Waxay ku tababartaa shaqaalaha aragtiyaha hadda jira iyo cilmi baadhisaha si ay u fahmaan dhaq-dhaqaqa bulshooyinka dhaqamada kala duwan ka dhex jira oo ay taageeraan la shaqeynta qoysaska.</p> <p>D. Wuxuu falanqeeyaa waxtarka ka-qaybgalka qoyska iyo kooxaha la-talinta, wuxuuna isticmaalaa xogta si uu u hagaajijo barnamijka.</p> <p>E. Wuxuu kormeeraa horumarinta siyaasadaha barnamijka, nidaamyada, iyo maareynta khatarta ee ku saabsan ka qaybgalka qoyska.</p> |

Tixgelinada

- Sideed u ixtiraami kartaa doorashooyinka iyo dhaqamada qoysaska kala duwan?
- Waa maxay dariiqooyinka hal abuur leh oo lagu baran karo qoysaska aan ku hadlin luqadda shaqaalaha barnamijka?
- Sideed ugu casuuntaa qoysaska inay ku siyaan ra'yi-celin/waxtarid ku saabsan qaabka wax-barashada barnamijkaaga?

TUSMADA QEYBTA VIII: Qoysaska, Bulshooyinka iyo Dugsiyada *SII SOCDA*



VIII-2. SHURAAKADA BULSHADA

Xirfadlayaasha waxaa laga filayaa inay la shaqeeyaan ururada bulshada si ay u daboolaan baahiyaha carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska, iyo dhiirigelinta ka qaybgalka bulshada ee hawlaho barnamijka.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|---|---|
| A. La wadaaga maclummaadka ku saabsan ilaha bulshada ee laga yaabo inay bixiyaan adeegyo iyo waxqabadyo carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska. B. Si wada jir ah ula shaqeeya tabaruceyaasha iyo la-hawlgalayaasha si ay si wax ku ool ah u taageeraan barnamijka. C. U abuuraa fursado carruurta iyo dhallinyarada si ay wax uga bartaan oo ay ugu taageeraan bulshadooda waxqabadyada, mashaariicda adeeggaa, ama safarrada dibadda. | A. Wuxuu abuuraa fursado uu kula shaqeeyo, dhegeysto, oo uu jawaab-celin ka helo xubnaha bulshada ama shuraakada. B. Waxay la shaqaysaa shuraakada bulshada si ay u qorto tabaruceyaalama u sugaan agabka lagu taageerayo barnamijyada iyo hawlaho. C. Wuxuu ka qaybqaataa dejinta hantida bulshada iyo qiimaynaha baahiyaha. | A. Waxay kordhisaa ama dhista xidhiidh cusub oo lala yeesho shuraakada bulshada si loo daboolo baahiyaha carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska. B. Waxay dhista iskaashi ama wadashaqayn dhinacyo badan leh si loo taageero carruurta iyo dhalinyarada guud ahaan shirkadaha iyo machadyada bulshada dhexdeeda. C. Waxay u samaysaa hagitaan iyo fursado shaqo-barashada carruurta iyo dhallinyarada si ay u baadhaan danaha shaqada. |

Tixgelinada

- Sideed u dhisi kartaa xidhiidh la-hawlgalayaasha bulshada oo ku dhisan awood la wadaago iyo ixtiraam labada dhinac?
- Waa maxay noocyada fursadaha aad siiso si aad ugu dhiirigeliso carruurta inay la shaqeeyaan bulshadooda?

VIII-3. SHURAAKADA DUGSIYADA LALA LEEYAHAY

Hoggaanka shaqaalaha iyo barnaamijku waa in ay dhisaan xidhiidh wanaagsan oo ay la yeeshaan dugsiyada si ay si wada jir ah u daboolaan baahiyaha carruurta iyo dhallinyarada, oo ay xoojiyaan xidhiidhka ka dhexeeya waxbarashada maalinlaha ah ee dugsiga iyo wakhtiga ka baxsan dugsiga.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|--|--|
| <p>A. Waxay ilaalisaa xidhiidhka wada shaqayneed ee ka dhexeeya dugsiyada iyo barnaamijka.</p> <p>B. Wuxuu ka qaybqaataa tababbarka ku saabsan akhris-qorista, xisaabta, iyo manaahijita sayniska ee loo isticmaalo dugsiyada ka qaygalayaasha barnaamijka.</p> <p>C. Waxay gacan ka geysataa horumarinta xeeladaha lagu kicinayo waxbarashada iyada oo loo marayo waxqabadyo.</p> <p>D. Waxay taageertaa dhacdooyinka wadajirka ah ee dugsiyada si loo dhiso xidhiidhka iyo isku xidhka dhalinyarada, qoysaska, dugsiyada, iyo shaqaalaha barnaamijka.</p> <p>E. Wuxuu muujiyaa aqoonta ku saabsan siyaasadaha/dhaqanka haga xidhiidhka iyo xog wadaaggaa dugsiyada iyo barnaamijka/shirkada.</p> | <p>A. Wuxuu waafajiyya ku dhaqanka barnaamijka siyaasadaha dugsiga ee ka tarjumaya dhaqanka qoysaska iyo barnaamijyadooda.</p> <p>B. Nakhxadeeyaan hawlah barnaamijka si ay u taageeraan oo ula jaan qaadaan Washington Gobolka Grade Level Expectations (Heerka Fasalka Gobolka) (GLEs).</p> <p>C. Barnaamijyada dugsiga ku saleysan, waxay fududeeyaan hawlah barnaamijka ee shuraakada dugsiga.</p> <p>D. Waxay horumarisaa cilaqaadka shaqaalaha dugsiga si loo aqoonsado la qabsiga suurtagalka ah si looga shaqsiyeeyo adeegyada ama la waafajiyo ujeedooyinka waxbarashada fasalka.</p> | <p>A. Si kutalagal ah u waafajiyo ujeedooyinka barnaamijka iyo hadafyada waaweyn ee qorshooyinka horumarinta tacliinta dugsiga/degmada.</p> <p>B. Waxay hirgelisaa istaraatijiyadaha badalista ee horumarka fasalka dugsiga si loo hubiyo iskubeddel guul leh oo arday kastaa helo.</p> <p>C. Wuxuu horumariyaa heshiis iskaashi oo qoran oo lala yeesho maamulka dugsiga ama degmada wuxuuna sameeyaa qiimay joogto ah oo ku saabsan waxtarka heshiiska.</p> <p>D. Barnaamijyada dugsiga ku saleysan, waxay horumariyan qorshe ku saabsan isticmaalka agabka la wadaago ee dugsiga, oo waxay soo jeediyaan talooyinka isbeddellada haddii loo baahdo.</p> |

Tixgelinada

- Sideed uga doodi kartaa waxyabaha ku wanaagsan shuraako kastaa u keeno barnaamijka iyo carruurta iyo dhallinyarada?
- Waa kuwee hab-dhaqannada wada-xidhiidhka iyo iskaashiga hubin doona xidhiidh ixtiraam leh, oo midho-dhal leh?





QORSHEYNTA IYO HORMARINTA BARNAAMIJKA

IX-1. QORSHEYNTA IYO QIIMEYNTA BARNAAMIJKA

Barnaamijyada waxaa laga filayaa inay ka qaybqaataan horumarinta tayada joogtada ah si ay u bixiyaan tayada ugu sareysa ee adeegyada carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska. Barnaamijyada waa in ay si joogto ah u qiimeeyaan koox daneeyayaal kala duwan. Fikradaha la helay waa in loo adeegsadaa in lagu wargeliyo horumarinta waxsoo-saarka barnaamijka.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|---|--|
| A. Waxay wadaagaan fikrado iyo jawaab celin si ay u taageeraan kooxda shaqaalahi hawlahi qorsheynta barnaamijka. B. Wuxuu yaqaan ujeedada, hadafka, iyo siyaasadaha barnaamijka, iyo sida loo galo sharciyada khuseeya carruurta iyo dhalinyarada. C. Wuxuu doortaa, adeegsadaa, oo codsadaa qalab, agab, iyo khayraad ku habboon hawlahi barnaamijka. D. Wuxuu sharaxa xidhiidhka ka dhxeeyaa dhaqamada maalinlaha ah iyo falsafada barnaamijka. | A. Wuxuu qorsheeyaa wacyigalinta qoyska iyo ilmaha/dhallinyarada iyo hawlahi. B. Wuxuu adeegsadaa aalada ka-hortagga eexda iyo midab-takoorka xagga naqshadaynta barnaamijka. C. Wuxuu dabaqaa aqoonta federaalka, gobolka, iyo sharciga deegaanka, qawaaniinta, iyo heerarka xirfaddeed si loo bixiyo caafimaad, badqab, iyo barnaamij waxtar leh. D. Ka qayb galka daneeyayaasha bulshada qaabaynta iyo qorshaynta barnaamijka. E. Waxay fulisaa hababka qiimaynta barnaamijka ku habboon, iyadoo tixgelinaysa ujeeddooyinkooda iyo xaddidahooda. | A. Wuxuu adeegsadaa xogta qiimaynta si uu ugu sheego hagaajinta qaabka manhajka iyo hababka barnaamijka. B. Waxay fududaysaa qorshaynta istiratiijiyadeed iyo waxqabadyada dejinta yoolka ee ku lug leh shaqaalahi, dhalinyarada, qoysaska, iyo bulshada. C. Wuxuu maamulaa agabka barnaamijka si wax ku ool ah wuxuuna horumariyaa xeeladaha maaraynta khatarta si wax looga qabto caqabadaha la filayo. D. Waxay fulisaa xeeladaha xidhiidhka dadweynaha si kor loogu qaado barnaamijka bulshada dhexdeeda. |

Tixgelinada

- Sidee ayaa wakiilada caruurta iyo bulshadu u noqon karaan codkooda kujira qorshaynta barnaamijka?
- Dhallinyarada iyo qoysasku si macno leh ma ugu jiraan qorshaynta iyo horumarinta barnaamijka?
- Sidee barnaamijkaagu u horumariyaa oo u muujiyaa hadafka shirkadaada?

IX-2. MAAMULKA SHAQAALAHAYA IYO MAALIYADA

Barnaamijada waxaa laga filayaa inay yeeshaan siyaasado iyo habraacyo la xidhiidha shaqaalaha iyo maamulka maaliyadda, iyo inay isticmaalaan hababka ugu wanaagsan si loo maamulo dhinacyadan barnaamijka.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|--|--|
| <p>A. Wuxuu lasocdaa shaqaalaha barnaamijka iyo siyaasada maaliyadeed iyo habraacyada.</p> <p>B. Waxay ilaalisaa alaabta, qalabka, iyo agabka sida la codsado.</p> <p>C. Wuxuu ku shaqeeyaa miisaaniyada oo wuxuu raacaa dhamaan nidaamyada xisaabaadka.</p> <p>D. Wuxuu dhisaa cilaqaadka shaqaalaha iyo/ama mutadawiciinta si loo xoojiyo iskaashiga taageerada barnaamijada iyo hawlaho.</p> <p>E. Wuxuu muujiyaa fahamka hababka dhismaha kooxda iyo fursadaha.</p> | <p>A. Wuxuu bilaabayaa xeelado ku habboon xalinta mashaakilaadka iyo xallinta khilaafadka kooxaha shaqaalaha.</p> <p>B. Waxay fududaysaa xidhiidhka shaqaalaha iyo maamulayaasha.</p> <p>C. Wuxuu caawinayaa qorsheynta barnaamijka miisaaniyada.</p> <p>D. Waxa uu kormeeraa shaqaalaha, layliyaa, tababarayaasha, iyo/ama ardayda nidaamka isticmaalaya ka-hortagga eexda, hababka midab-takoorka.</p> <p>E. Waxay ka hawlgeesaa shuraakada bulshada maxalliga ah iyo ganacsijada si ay uga caawiyaan aqoonsiga ilaha dhaqaale ama agabka khayraadka cusub ee barnaamijka.</p> | <p>A. Wuxuu adeegsadaa muraayadda sinnaanta jinsiyadda si uu u horumariyo, u qiimeeyo, oo dib ugu eego qorista, shaqaaleysiinta, kormeerka, iyo hawsha/siyaasadaha aqoonsiga.</p> <p>B. Waxay hubisaa in miisaaniyaddu ay la jaanqaado hadafka, himilada iyo yoolalka barnaamijka kale.</p> <p>C. Si firfircooni u lafaguro oo u ilaaliso miisaaniyada si loo hubiyo isticmaalka waxtarka leh ee agabka.</p> <p>D. Wuxuu raadiyaa oo helaa fursado maalgelineed oo dheeri ah si uu u taageero oo uu u joogteeyo barnaamijada hadda jira iyo kuwa cusub.</p> <p>E. Waxay tababartaa oo taageertaa maareeyayaasha si ay u hirgeliyan hab-dhaqannada tayada sare leh ee loo siman yahay oo loogu talagalay maareynta shaqaalaha iyo miisaaniyadaha barnaamijka.</p> |

Tixgelinada

- Maxay la macno tahay in aan noqdo wakiilkha wanaagsan ee barnaamijkayga agabkiisa aadanaha iyo maaliyadda sanadlaha ah?
- Markaad shaqaale qoranayso sidee ayaad u isticmaalaysaa nidaamka sinnaanta jinsiyadda si aad u hubiso in shaqaalaha barnaamijkaagu ay ka tarjumayaan bulshada aad u adeegto?
- Maxaad u kala horraysiinaysaa inta kujirta gacantaada miisaaniyadaada iyo sidee ayaad u gaadhaysaa go'aamadaas?



HORUMARINTA XIRFADA IYO HOGAAMINTA

X-1. KA GO'ONAANSHABA SI LOO IXTIRAAMO BARNAAMIJKA IYO DADKA ISKALEH

Xirfadlayaashu waxay leeyihii aragtiyo gaar ah oo ku saabsan awooda barnaamijka, waxayna isticmaali karaan aragtidooda si ay u horumariyaan bixinta adeegga. Dhammaan shakhsiyadka waxaa laga filayaa inay fahmaan hadafka barnaamijka, hiigsiga, iyo dhaqanka oo ay siiyan adeegyo ixtiraam leh carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|--|---|
| A. Wuu fahmayaa in dabeecadaha shakhsii ahaaneed iyo ficiolla goobta shaqadu ay ka tarjumayaan barnaamijka. B. Dharka dharka dhaqanka ku habboon ee ka qayb qaadashada dhammaan hawlahu barnaamijka. C. Wuxuu muujiyaa ka go'naanta falsafada iyo yoolalka barnaamijka. | A. Wawa uu ka qaybqaataa xalinta kooxda iyo go'aan ka gaadhista arimaha barnaamijka. B. Wuxuu raadiyaa oo uu ku dhaqmaa jawaab celinta asxaabta, qoysaska, iyo cunuga/dhallinyarada ka qaybgalayaasha. C. Waxay ilaalisaa da'da iyo xuduudaha dhaqan ku-habboon ee xidhiidhka shaqaalaha, ka qaybgalayaasha, iyo qoysaska. | A. Horumarinta dhaqamada barnaamijka iyadoo la qaadanayo cilmi baadhista iyo dhaqamada rajooyinka leh ee carruurta, dhalinyarada, qoysaska, iyo shaqaalaha. B. Waxay ku talinaysaa oo kor u qaadaa siyaasadaha, dhaqamada, iyo maalgelinta ee aqoonsa una dabbaaldegtu guulaha shaqaalaha iyo ka go'naanta carruurta, dhalinyarada, iyo barnaamijyada. |

Tixgelinada

- Sidee habdhaqankaagu u muujiyaa ixtiraamka dhammaan dhalinyarada, qoysaska, iyo shuraakada barnaamijka?
- Sidee barnaamijkaagu u qeexayaa xirfadlaha iyo sida uu u eekaanayo?

X-2. KOBACA XIRFAD EE SOCONAYA

Shaqaalaha dhammaan doorarka oo dhan waxaa laga filayaa inay ka qaybqaataan horumar joogto ah iyada oo loo marayo dib u eegis, hadaf-dejin, iyo fursado waxbarasho xirfadeed.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|--|---|---|
| <p>A. Wuxuu raadiyaa aqoonta si uu u horumariyo aqoonta xirfadeed, xirfadaha iyo awoodaha.</p> <p>B. Wuxuu isticmaalaa falcelinta si uu ugu wanaajiyoo aqoonta xirfada iyo hawsha.</p> <p>C. Wuxuu daraaseeyaa oo uu wax kabartaa ku-dhaqankiisa oo dejiya hadafyo lagu kordhiyo xirfadaha iyo awoodaha.</p> <p>D. Ka qaybqaata horumarinta xirfadeed ee socda iyada oo loo marayo dejinta yoolka, tababarka, iyo hawlaho dib u eegista.</p> <p>E. Wuxuu la yeelayaa xidhiidh asaagiisa nidaamyada kala duwan ee dhalinyarada.</p> | <p>A. Si joogto ah u sii qoto dheeereeya fahamka dhammaan kooxaha dhaqameed ee goobta loo adeego.</p> <p>B. Wuxuu si joogto ah uga qeyb yahay barasada nidaamyada kahortaga eexashada iyo takoorka.</p> <p>C. Wuxuu diyaarinayaa oo fulinayaa qorshaha horumarinta xirfada oo waafaqsan hadafyada xirfada.</p> <p>D. Wuxuu la nashqadeynayaa fursadaha horumarinta shaqaalaha ee dadka wada-shaqeeyaa.</p> <p>E. Wuxuu ka qeybgalayaa shirarka deegaanka, gobolka, ama dalka si loosii wado waxbarashada.</p> | <p>A. Wuxuu tabobarayaa oo dhiirigalinayaa horumarka xirfadeed ee dadka kale.</p> <p>B. Wuxuu si firfircoon uga qeybgalayaa ururada xirfadeed.</p> <p>C. Wuxuu fahmayaa isbadelka nidaamka wuxuuna diyaarinayaa xeerkarka lagu taageeraayo horumarka xirfadeed.</p> <p>D. Wuxuu isticmaalayaa aqoon dheeriya wuxuuna hirgalinayaa nidaamyo cusub oo la xidhiidha wadajirka, dhaqanka, sinaanta, iyo kahortaga takoorka si shakhsiyan uu ugu horumaro oo dadka kalea u dhiiriyo.</p> |

Tixgelinada

- Sidee ayaad uga ciyari kartaa door firfircoon horumarkaaga xirfadeed?
- Caawimo nooceee ah ayaad uga baahan tahay dadka kale si aad u gaadhid hadafkaaga?





X-3. HOGAAMINTA IYO OLALEYNTA

Dhammaan shaqaluhu waxay fursad u leeyihiin inay u muujiyaan hogaan iyo taageero iyagoo matalaya barnaamijka waxbarashada la balaadhiyey, caruurga, dhalinyarada, iyo qoysaskooda.

| Dhaqan Soo Baxaya | Dhaqan Hirgalaya | Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo |
|---|--|--|
| <p>A. Wuxuu aqoonsanayaa noocyada hoganka iy hab-dhaqanada qofka iyo dadka kale.</p> <p>B. Wuxuu aqoonsanayaa baahiyaha bulshada ee saameynaya caruurga iyo dhalinyarada.</p> <p>C. Wuxuu isticmaalayaa xirfadaha xalinta dhibaatooyinka si uu u taageero dadaalada ololeynta.</p> <p>D. Wuxuu tilmaamayaa aqoonta arimaha ololeynta.</p> | <p>A. Wuxuu tusaaleynayaa noocyada hoganka iyo hab-dhaqanada.</p> <p>B. Wuxuu kor u qaadayaa xeerarka ugu wanaagsan/guusha leh ee horumarka dhalinyarada ilaa qoysaska, maamulayaasha, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada.</p> <p>C. Wuxuu sharxayaa nidaamka sharci, oo ay ku jiraan arimaha sharciga iyo ololeynta ee saameynaya caruurga, dhalinyarada, iyo qoysaskooda.</p> <p>D. Wuxuu sharxayaa sida siyaasadaha dawladu u saameeyaa qoysaka iyo horumarka canuga/barbaarka.</p> | <p>A. Wuxuu hogaaminayaa oo fulinaya qorshaha ololeynta.</p> <p>B. Wuxuu ka qeybalayaa ururada xirfadeed iyo/ama adeegyada dayatirka, shaqaalaha, ama gudida.</p> <p>C. Wuxuu u ololeyntayaa iskaashiga canuga/barbaarka-qofka weyn.</p> <p>D. Wuxuu u ololeyntayaa barnaamijyo la heli karo, la awodo, badqaba, oo tayo leh oo loogu talagalay caruurga iyo dhalinyarada heerarka maxaliga iyo gobolka.</p> <p>E. Wuxuu siinayaa hogaamin xoogaan iyo jihohiigsi leh.</p> |

Tixgelinada

- Qaabab nooceet ah ayaaad u isticmaali kartaa doorkaaga si aad ugu ololeysid caruurga iyo dhalinyarada? Qoysaska? Xirfadlayaasha kale?
- Sidee u aqoonsan lahayd baahiyaha bulshada?
- Sidee ayaaad ugu dartaa ololeynta dhaqanka barnaamijkaaga?

TIXRAACYADA

Bulshada Eeshiyaanka. (2010). Lagasoo dheegtay 2010 ee <http://asiasociety.org/files/afterschool-youthworker.pdf>.

The Aspen Institute (Mahadka Aspen). Eray-bixinta Fahamka Soo-afjarida Takoorka/Falanqeynta Kor u Qaadida Sinaanta Isirka.

California Beri. Waxka qabanaya Sinaanta iyo Kaladuwanaashaha: Qalabka Isbadelka Barnaamijyada Dugsiga Kadib iyo Dhalinyarada. Hordhaca Agabka.

Xafiiska Xirfadaha Barbarinta Caruurta ee Colorado. (2005). Biriishka Aqoonta-sare: Horumarinta Xirfada Da'da Dugsiga/Dhalinyarada ee Lattice. Xafiiska Xirfadaha Barbarinta Caruurta ee Colorado, Denver CO.

Madasha Maalgashiga Dhalinyarada. (2004). Wareysiga Madashu la yeelatay Shawn A. Ginwright. Diirada Madasha, Kahortaga Takoorka Isirka. Majalada 2, Arinka 3. Julaay/Ogos 2004.

Fletcher, Adam. Eray-bixinta Codka Dhalinta. Mashruuca Bilshaa ee Canuga. Lagasoo Dheegtay Diseembar 2009 ee <http://www.freechild.org/glossary.htm>

Hammond, Z. L. (2015). Waxdhigista dhaqanka haboon iyo maskaxda. Saxaafada Corwin

Karunta Ikhtiraaca ee Horumarinta Bulshada iyo Dhalinyarada. (2004). Sameynta Isbadel: Sida Haayaduhu ula Xidhiidhaan Dhalinyarada, u Dhisaan bulshooyinka, iskuna Xoojiyaanka Iyagu. Lagasoo Dheegtay 2009 ee Kansas and Missouri. (2001). Xirfadaha Muhiimka ee Xirfadlayaasha Horumarinta Dhalinyarada. Daabacaadii Koobaad.

Kivel, Paul. (2006). Xulufada: Maxay Dadka Dhalinyarada ah Inooga Baahan Yihii? Lagasoo Dheegtay Diseembar 2009 ee <http://www.paulkivel.com/resources/adultismalliance.pdf>

National Afterschool Association (Ururka Qaranka ee Dugsiga Kadib). (2021). Aqoonta, Xirfadaha, iyo Awoodaha Rasmiga ah ee Xirfadlayaasha OST. Lagasoo dheegtay 2022 rom

Shaqaalaha Qaranka ee Horumarinta Xirfada. (2004). Jimicyada cusub ee 4-H Horumarinta Xirfada Dhalinyarada. Xarunta 4-H Qaranka, Wadashaqeynta Gobolke ee Cilmi-baadista Waxbarashada iyo Adeega Balaadhinta, USDA.

Magaalada New York Department of Youth and Community Development (Waaxda Horumarinta Dhalinyarada iyo Bulshada). (2008). Xirfadaha Muhiimka ee Xirfadlayaasha Shaqada Dhalinyarada.

Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha). Individualized Education Program (Barnaamija Waxbarashada Shaqsiga ah, IEP). Lagasoo Dheegtay 2022 ee <https://www.k12.wa.us/student-success/special-education/family-engagement-and-guidance/individualized-education-program-iep>

Jaamacada Gobolka Ohio. Asaasiyaadka Youth Leadership Development Program (Barnaamija Horumarinta Hogaanka Dhalinyarada). 4-H Teen Leadership. Lagasoo Dheegtay 2010 ee <http://ohioline.osu.edu/4-H/tl19.html>

Degmada Palm Beach. (2008). Sameynta Wadada Guusha: Xirfadaha Muhiimka ah ee Xirfadlayaasha Dugsiga Kadib. SOAR. Hogaanka Dhalinyarada Dhaqamada Kala Duwan. Seattle, WA.

Race Forward. (2015). Hagaha Kawarbixinta Tartanka. Lagasoo Dheegtay 2022 eee www.raceforward.org/reporting-guide

Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle Public Schools. Lagasoo Dheegtay Sabteembar 2009 ee <http://www.seattleschools.org/area/advlearning/standards.htm>

Tzenis, J. Jaamacada Minnesota. Barnaamijyada dhaqanka kuhaboona ee dhalinyarada looguna talogalay dhalinyarada muhaajiriinta. (Diblo Eegay 2020). <https://extension.umn.edu/equity-culture-and-identity/culturally-responsive-youth-programs-immigrant-youth>

World Health Organization (Haayada Caafimaadka Adduunka). Lagasoo Dheegtay Sabteembar 2010 ee <http://www.who.int/mediacentre/factsheets/fs220/en/>

Dhammaan tixraacyadu waa wakhtiga daabacaada laakiin dib baa loo eegi karaa hadhow.

LIFAAQA A: ERAY-BIXINTA

XULUFADA WAAYEELKA

Xulufada waayeelku waa qof aan isku arkayn canug/barbaar oo mataalisaashiga lala leeyahay caruurta/dhalinyarada. Xufaysiga waayeelka waxa lagu dhiirigaliyaa xidhiihada gaarka ah, dhaqanka, ama haayadeed isagoo caawinaya dadaalada canuga/barbaarka, abuuraya iskaashi, ama siinaya tababar caadiya ama dadban. (Fletcher)

WAAYEELNIMADA

Waayeelnimada "waxa lagu tilmaamaa hab-dhaqanada iyo aragtiyaha ku saleysan fikirkira in waayeelku ka fiican yahay dadka yaryar, xaqna u leeyahay inuu maamulo dadka yaryar iyagoon ogoleyn. La dhaqanka aan fiicneyn waxa xoojiya haadaya bulshada, shuruucda, caadooyinka iyo aragtiyaha." (Bell, 1995). Waayeelnimada waxa ka mida doorashada aragtiyaha, fikradaha, tallaabooyinka, luuqada, iyo dhaqanka waayeelke oo keenaya in waalidku sameeyo go'aanka arimaha saameynaya caruurta iyo dhalinyarada.

LADAGAALANKA EEXDA

Talaabada in si firfircooni loo diido ama loo mabnuuco takoorka xaq-darada ah ee ka dhanka ah dadka ee ku saleysan isirka, diinta, awoodaha, jinsiga, muuqaalka, iyo dhinacyada kale ee aan la badeli karin ee aqoonsiga qofka. Macneheedu waa kahortaga ama joojinta eexashada. Inaad kahortagtida eexasho waxa ka mida ixtiraamida iyo soo dhaweynta kala duwanaanshaha.

LADAGAALANKA TAKOORKA

Ladagaalanka Takoorka waxa lagu waxa lagu qayaxaa shaqo ah inaad si joogto ah u diidid isir naceybka adoo u ololeynaya isbadelada siyaasada, dhaqaalaha iyo nolosha bulshada. Ladagaalanka takoorku waa nidaam gaara, waxaana loogu talagalay in lagu diido hab-dhaqanada takoorka shakhsiyad iyo saameynta. (Race Forward)

XEERARKA UGU FIICAN

Manhajka ku saleysan cadeynta, barnaamijyada iyo nidaamyada kale ee wanaagsan.

WAXBARASHADA LA BALAADHIYEEY

Qeybta daryeelka caruurta, dugsiga kadib, horumarinta dhalinyarada, ama waxbarashada la balaadhiyey ee caruurta iyo dhalinyarada da'aha 5-18.

MASKAXDA/CAQLIGA

Waxa lagu tilmaamaa labada aqoonta uu leeyahaya iyo awooda barbaarka ee inuu fikiro, wax qyaaso, barto oo fahmo. Caruurta yaryar ee da'da dugsigu badanka waxay u fikiraan qaabab macquula. Caruurta Waaweyn ee da'da dugsiga (barbaarta) waxay bilowdaa inay isticmaalaan hab fikiro xoogan.

DHAQANKA

Dhaqanku wuxuu koobsadaa aqoonsiga, aragtiyaha, iyo xeerarka ay ku jiraan isgoyska dhalashada qofka, diinta, luuqada, rabitaanka galmo, heerka dhaqaalaha bulsho, da'da, jinsiga, isirka/qoomiyada, iyo horumarinta jidhka/awooda.

BARNAAMIJKA FAHAMKA DHAQANKA

Nidaam tixgalinaya astaamaha, khibradaha, iyo aragtiyaha dhaqanka dhalinyarada ee nashqadeeynta iyo hirgalinta barnaamijka (Tzenis, 2020). Barnaamijyadan oo kale waxay leeyihiin shaqaale xasaasi ku ah halkuu kasoo jeedo kaqeybaluhu; agabka ka turjumaya kala duwanaanshaha dhaqanka, luuqada, iyo khibradaha; ee isku xidhaya qoysaska dadka yaryar iyo khayraadka bulshada. Waxa intaa dheer, barnaamijyadan waxay aqoonsadaan oo ixtiraamaan caadooyin iyo dhaqamo kala duwan umana dulqaataan eexashada iyo takoorka." (California Beri)

KALADUWANAANSHABA

"Kala duwanaanshaha waxa lagu sheegaa waxyaabaha kala duwan iyo isirada koobsanaya bulsho, qaran ama kooxo kale. Inta badan weedha kala duwanaansho kaliya ma tilmaamayso jiritaanka kasoo jeedida meelo, isiro, jinsi, diin, rabitaan galmo, iyo wixii la mida oo kala duwan, laakiin waxay soo jeedinaysaa ixtiraamida kala duwanaanshahaasi." (The Aspen Institute, Machadka Appen)

SINAANTA

Xaalad sinaan iyo cadaalad ah; sixida kala duwanaanshaha ay waajahaan dadka laga tirada badan yahay.

INDIVIDUALIZED EDUCATION PLAN (QORSHABA WAXBARASHADA SHAQSIGA AH, IEP)

"IEP waxa loogu talagalay inuu si cad ugu gudbiy waalidiinta/daryeel-bixiyayaasha, ardeyga, iyo adeeg-bixiyayaasha nooca iyo xadiga waxbarashada gaarka ah iyo adeeg kasta oo la xidhiidha daruurina ah ama caawinaya oo ardeygu helaayo. Warbixinta qiimeyntii ugu danbeysay ee loo isticmaalo horumarinta IEP. IEP waxa loogu talagalay inuu ka turjumo baahiyaha gaarka ah ee ardeyga iyo sida baahiyahaasi wax looga qabanaayo si loogu sahlo in ardeyga lagu daro iyo horumarka manhajka waxbarashada guud." (Office of Superintendent of Public Instruction (Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha))

WARBIXIYAHOO LOO IGMADAY

Xirfadlayaasha sharchiyan looga baahan yahay inay kasoo warbixiyaan xadgudubka caruurta ama dayacaada.

CAAFIMAADKA MASKAXDA

"Caafimaadka maskaxda waxa lagusoo koobi karaa xaalad badqabka taasoo shakhsiyadku aqoonsadaan awoodahooda, waxa ka qaban karaan walaaca caadiga ee nolosha, u shaqeyn karaan si wax tarleh oo midho dhal leh, oo ay awoodaan inay wax ku celiyaan bulshooyinkooda." World Health Organization (Haayada Caafimaadka Adduunka)

DULMI

U fulinta xukunka ama awooda si cadaalad dar ah, natijjooyinka ka dhashaana uga eexanayaan koox kuwo kale laguna ilaaliyo xeerkarka iyo aragtiyaha bulshada.

XUQUUQ

Xuquuqaha, faa'idooyinka, ama isticmaalka nidaamyaada/haayadaha ee loo bixiye xuquuq uu qof leeyahay oo ku saleysan ka mid ahaanshihiisa koox (sida isirka, rabitaanka galmo, jinsi, da'da, iwm.).

HORUMARINTA XIRFADA

Fursadaha kor u qaadaya aqoonta iyo xirfadaha xirfadlaha ee saaeynaya dareenka/aragtiyaha; tani waxa ku jiri kara tababarada, shirarka, carbinta, koox dhisida, iwm.

BAAHIYAHOO GAARKA AH

Baahiyaha ardeyda loo aqoonsaday ama hela adeegyada waxbarashada gaarka ah ee dugsiyada dadweynaha iyadoo la raacayo Shakhsiyadka leh Disabilities Education Improvement Act (Xeerka Horumarint Waxbarashada Shakhsiyadka Naafada ah) ee 2004.

NIDAAMKA KU SALEYSAN AWOODA, QOYSKA

Nidaamka ahmiyad siinaya qoyska, halkii canuga laga kasiin lahaa, oo diirada saaraya awoodaha qoyska iyo awoodaha qoysku ku xalinayo dhib. Wuxuu isku darayaa wadashaqeyn dhex marta qoysaska dugsiga iyo adeeg-bixiyayaasha, isagoo xoojinaya iskaashiga iyo dhisida bulshada.

HORUMARINTA DHALINYARADA

Xoojinta dhalinyaradu waa labadaba hadafka iyo shaqada dadka yaryar ku helaan aqoonta iyo xirfadaha caawinaya awoodooda ay ku abuurayaan isbadelka noloshooda iyo adduunka ay ku nool yihiin. (Fletcher)

HOGAANKA DHALINYARADA

Hogaanka dhalinyaradu waa aragti balaadhan oo la xidhiidha aqoonta, fikradaha, xirfadaha, hab-dhaqanada, iyo aragtiyaha uga faa'idaysto hal ama dhowr caruura/dhalinyaro saameynta, dhiirigalinta, ogeysiinta, iyo kula talinta tallaaboooyin wanaagsan iyo kafalcelinta dadka kale. (Jaamacada Gobolka Ohio)

CODKA DHALINYARADA

Hadafka fikirka codka dhalinyaradu waa in fikradaha, aragtiyaha, khibradaha, dareemada, aqoonta, iyo tallaabooyinka dadka yaryar si firfircoo loo raadiyo loona sharxo iyadoo la gaynaayo dadka yaryar madalo iyo doorar go'aan qaadasho si ay u bixiyaan aragtidooda, fikirkooda, iyo khibradooda. (Fletcher)

HEERARKA WAXBARASHADA GOBOLKA WASHINGTON

Shuruudahani waxay qayaxayaan waxa dhammaan ardeydu ay tahay inay ogaadaan oo ay awoodaan si ay u sameyn karaan heer fasal kasta, waxaana ku jira qeybaha madaada ee akhriska, qoraalka, xisaabta, sayniska iyo barashada bulshada.

CAAFIMAADKA

"Badqabku waa xaalad ladnaan jidheed, maskaxeed iyo bulsheed oo dhamaystiran ee maaha kaliya maqnaanshaha cudur ama jirro." (World Health Organization (Haayada Caafimaadka Adduunka))

LIFAAQA B: TAARIKHDA

Sanadkii 2004, Qorshaha Kadib Dugsiga ee Gobolkoo dhan iyo kadib ayaa warbixin u gudbiyey Sharciga Gobolka Washington oo kula taliyey maalgalinta dheeriga ah ee fursadaha horumarinta xirfadaha ee shaqaalaha kadib dugsiga ee Washington. Qorshahaasi waxa lagu sameeyey codsiga Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha, Dr. Terry Bergeson, oo uu weheliyo hogaanka School's Out Washington.

Sanadkii 2006, School's Out Washington ayaa raadiyey oo ka helay maalgalin haayada Paul G. Allen Family Foundation si ay qaadaan tallaaboooyin geesinimo leh oo ay ku abuurayaan nidaamka horumarinta xirfada gobolka ee la xidhiidha qorshahan gobolkoo dhan. Khayraadkan lagu dadaalay waxay fududeeyeen nashqada daraasada shaqaalaha iyo raacida warbixintta, Shaqaalaha Si Fiican u diyaarsan wuxuu Soosaaraya Caruur Wanaagsan, waxa lagu aqoonsaday nidaamka balaadhan ee afterschool and youth development

(dugsiga kadib iyo horumarinta dhalinyarada, AYD)
nidaamka
horumarinta
xirfada.



2009 – SIYAASADA I

Cabirka natijjooyinka waxa lala diyariyey Haayada Adeegyada Cilmi-Baadhistaa, Fasax Dugsiyada Washington, iyo daneeyayaasha gobolkoo dhan ee qeybta AYD. Dhukumentigani waxa la dhammeystiray oo la ansixiyet Noofeembar 2009.

SIYAASADA II

Sabteembar 2009, gudida gobolkoo dhan ayaa u isticmaalay Xirfadaha Muhiimka ah ee Kansas iyo Missouri ee dhukumentiga Xirfadlayaasha Horumarinta Dhalinyarada bar-bilow ahaan si ay ugu hagaan nidaamka Gobolka Washington. Dhukumentiga qabyo-qoraalka ah ayey diyaariyeen, dibu eegeen, saxeen gudidu waxaana lagu baahiyey xog-ururinta intarnadka si qiimeyn xirfadeed iyo dibu eegis gobolku ugu sameeyo. Gudida Gobolka Washington waxay dibu eegtay qabyo-qoraalka xirfadaha iyadoo ka jawaabaysa soojeedinaha dibueegayaasha, taasoo abuurtay daabacaadii koobaad. Madaamoo baahiyaha aqoontu isbadelayo wakhti kadib, dhukumentigani dib ayaa loo eegi karaa waana la sixi karaa markii loo baahdo.

SIYAASADA III

Xirfadlayaasha horumarinta caruurga iyo dhalinyaradu waxay u baahan yihiin luuqad caama iyo rajoojin caama oo ka qeyb ah tayeynta shaqada iyo abuurida fahamka nidaamka horumarinta xirfada. Diyaarinta aqoonsiga xirfada, qayaxida, iyo doorka AYD waa u muhiim fahamka gudaha iyo dibada ee aqoonta. Luuqada caamka ah waxa lagu bixiyaa dadaalkan wadajirka ah oo dhukumentigani wuxuu fududeyn doonaa aqoonsiga wanaagsan ee saameynta togan iyo natijjooyinka canuga/barbaarka ee shaqaalaha sida fiican u diyaarsan. Dadaalkan loo dhan yahay wuxuu doortay weedha Xirfadlaho Horumarinta Canuga iyo Dhalinyaradu inuu matalo aqoonta.

Sanadkii 2021, waxaanu daahfurnay nidaamka dibu eegista si loo hubiyo in xirfaduhu ka turjumayaan cilmi-baadhistaa hadda, casharada laga bartay xanuunka, iyo dadaalka la cusbooneysiyyey ee sinaanta, wadajirka, iyo ladagaalanka takoorka, marka laga yimaad cusbooneysiinta kaleba. Xirfadlayaasha kasocday gobolkoo dhan ayaa ka qeyb ahaa taliyayaasha iyo xubnaha wareysiga, ee loo doortay inay mataalan kala duwanaanshaha aqoonta horumarinta canuga iyo barbaarta ee gobolka guud ahaan. Natijjada nidaamkani waxa ka dhashay Daabacaada Labaad.

LIFAAQA C: QALABKA IS-QIIMEYNTA

Waxaad u isticmaali kartaa qalabka is-qiimeyeenta inaad ku ogaatid cilmigaaga Qeyb kastoo Tusmada ah. Tani waxay ku siin doontaa fursad aad ku ogaatid awoodahaaga iyo qeybaha diirada la saarayo markaad noqtid xirfadle. Qalabka waxa ku jira saddex jawaabood oo macquula:

- **Haa:** Waxaad muujinaysaa xirfada.
- **Maya wali:** Waxaad fahamsan tahay xirfada, laakiin wali maad helin waxkasta oo la sheegay.
- **Ma hubo:** Waxaad u baahan tahay macluumaad dheeriya si aad u fahamtid xirfada.

Waxaad isticmaali kartaa qeybta Qoraalada si aad u qortid fikirkasta oo aad ka qabtid qiimeyntaada, sida cadeynta doorashadaada ama su'aal ku aadan xirfada.

Kadib markaad dhammeystirtid is-qiimeyeenta, wakhti ku yara bixi inaad kaga jawaabtid oo dejiso hadafyo si ay kuugu hagaan horumarinta xirfada.

QEYBTA 1: IS-QIIMEYNTA

TUSMADA QEYBTA 1: SINAANTA JINSIGA IYO KAJAWAABISTA DHAQANKA

| Dhaqan Soo Baxaya | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|---|-----|----------|---------|-----------|
| A. Wuxuu aqoonsadaa sida qofka isirkiisa, qowmiyaddiisa, hiddaha dhaqanka, luqadda/dadka, iyo aqoonsiga bulsheed iyo dhaqameed uu u heli karo mudnaan iyo/ama takoorid. | | | | |
| B. Waxay siisaa jawi loo dhan yahay, soo dhawayn leh, oo ixtiraam leh dhammaan children, youth, and families (caruruuta, dhalinyarada, iyo qoysaska). | | | | |
| C. Waxay u abuurtaa jawi badbaado leh caruruuta iyo dhalinyarada si ay u ogadaan aqoonsigooda, oo ay kujiraan caqii dooyinka iyo arimaha dhaqameed. | | | | |
| D. Waxay adeegsadaan agabka iyo dhaqamada ka tarjumaya oo qiimeyaan dhammaan jinsiyadaha, qowmiyadaha, jinsiga, dhaqamada, qoysaska, diimaha, wacyigalinta galmaada, luqadaha, iyo awoodaha jireed iyo korriin. | | | | |
| E. Wuxuu wax ka bartaa dhaqamada aduunka, oo ay ku jiraan qaybo la xidhiidha oogada, gacmeed, iyo dhaqanka qoto dheer | | | | |

Lifaaqa C: Qalabka Is-qiimeynata *SII SOCDA*

TUSMADA QEYBTA 1: SINAANTA JINSIGA IYO KAJAWAABISTA DHAQANKA

| Dhaqan Hirgalaya | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|---|-----|----------|---------|-----------|
| A. Waxay si qotodheer uga fakartaa xaaladaha dhaqan ahaan adag wuxuuna ka qayb qaataa wadahadal ku saabsan mudnaanta iyo dulmiga. | | | | |
| B. Wuxuu abuuraa deegaan ay carruurta iyo dhallinyaradu ku muujiyaan hanweynaanta aqoonsiga dhaqameed, waxay aaminsan yihiin, iyo ku-dhaqankooda. | | | | |
| C. Wuxuu xushmad u muujinayaan aqoonsiyada dhaqamada caruruut ay isku faca yihiin | | | | |
| D. Wuxuu qaabeeyaa fursadaha waxbarasho ee ka tarjumaya dhaqamada bulshada dhexdeeda iyo kala duwanaanshaha bulshada. | | | | |
| E. Wuxuu aqoonsadaa sida mudnaanta iyo cadaadisku u saameeyaan isdhexgalka caruruut, dhalinyarada, qoysaska, iyo bulshada. | | | | |

| Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|--|-----|----------|---------|-----------|
| A. Wuxuu dhisaa iskaashiyoo lala yeesho ururo bulsho oo dhaqan ururo gaar ah iyo kuwa kale ee la xidhiidha. | | | | |
| B. Wuxuu falanqeeyaa dhaqanka shirkada, siyaasadaha iyo nidaamyada wuxuuna fuliyaa isbeddelada kobciya dhaqamada ka jawaabaya sinnaanta iyo dhaqanka. | | | | |
| C. U dooda tababbarka socda si ay u qoto dheereeyaan barashada iyo falanqaynta nidaamyada la xidhiidha sinnaanta jinsiyadda, mudnaanta, iyo dulmiga naftooda, shaqaalaha, iyo ka qaybgalayaasha barnaamijka. | | | | |
| D. Ka qaybqaata ficalka wada shaqaynta iyo u doodista si loo beddolo nidaamyada maxalliga ah iyo kuwa qaranka ee ku wajahan sinnaanta jinsiyadda iyo caddaaladda bulshada. | | | | |

Lifaaqa C: Qalabka Is-qiimeyn ta *SII SOCDA*

■ TUSMADA QEYBTA II. BADQABKA IYO CAAFIMAADKA

II-1. Badqabka Deegaanka

| Dhaqan Soo Baxaya | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|---|-----|----------|---------|-----------|
| A. Waxay doorataa oo ay u ilaalisaa agabka iyo qalabka marka lajoogo dibada iyo gudahaba. | | | | |
| B. Si firfircoona u kormeera oo u dhixgalaa carruurta iyo dhalinyarada si loo hubiyo badbaadada inta lagu jiro dhammaan hawlaahaas. | | | | |
| C. Waxay ilaalisaa deegaan caafimaad qaba iyadoo la raacayo nidaamyada caafimaad, badqab iyo nadaafadeed. | | | | |
| D. Waxay maamushaa xaaladaha saameyn kara shakhsiyadka qaba xasaasiyadda, xiiqda, ama tabashooyinka kale ee caafimaadka. | | | | |
| E. Waxay fahmaysaa siyaasadaha gaadiidka iyo habraacyada barnaamijka. | | | | |

| Dhaqan Hirgalaya | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|---|-----|----------|---------|-----------|
| A. Wuxuu laqabsadaa deegaanka gudaha iyo dibadda si loo kordhiyo madax-banaanida carruurta iyo dhalinyarta baahiyaha gaarka ah qabta. | | | | |
| B. Wuxuu abuuraa deegaan lagula xisaabtamayo taxaddarrada iyo xeerarka badbaadada. | | | | |
| C. Waxay ka codsataa jawaab celinta carruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska si loo aqoonsado loona hagaajiyo arrimaha badbaadada deegaanka. | | | | |
| D. La wadaaga macluumaadka iyo agabka badbaadada ugu dambeeyay ee qoysaska iyo shaqaalaha. | | | | |
| E. Waxay ku haboontayah nidaamyada badqabka si loo hubiyo in safarada dibadu yihiin kuwo badqaba. | | | | |

Lifaaqa C: Qalabka Is-qiimeynta *SII SOCDA*

■ TUSMADA QEYBTA II. BADQABKA IYO CAAFIMAADKA

II-1. Badqabka Deegaanka

| Dhaqan Sii Qoto Dheeraanayo | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|--|-----|----------|---------|-----------|
| A. Kala taliya badqabka deegaanka ee dhamaan barnaamijyada iyo hawlahaa. | | | | |
| B. Waxay horumarisaa, dib u eegis, iyo/ama dib u eegtaa siyaasadaha iyo habraacyada badbaadada deegaanka ee ku salaysan cilmi baadhista hadda jirta. | | | | |
| C. Wuxuu tababaraa shaqaalaha iyo/ama mutadawiciinta ku saabsan siyaasadaha iyo nidaamyada badqabka barnaamijka. | | | | |

II-2. Caafimaadka

| Dhaqan Soo Baxaya | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|---|-----|----------|---------|-----------|
| A. Wuxuu muujiyaa nadaafadda saxda ah iyo hababka fayadhowrka, oo ay ku jiraan farsamooyinka gacmo-dhaqashada iyo hab-dhaqannada badbaadada leh ee maaraynta cuntada. | | | | |
| B. Wuxuu ka jawaabaa oo uu diiwaangeliyaa dhaawacyada, oo uu maalin kasta la socda carruurta iyo dhallinyarada leh calaamadaha xanunka iyo/ama calaamadaha xadgudubka iyo dayaca. | | | | |
| C. Wuxuu sameeyaa dhaqdhaqaqyo jidheed oo kala duwan oo buuxiya danaha, heerarka korriinka, iyo xirfadaha carruurta iyo dhalinyarada. | | | | |
| D. Waxay muujisaa ka warqabka arrimaha khatarta ah iyo doorashooyinka nolosha caafimaadka ee khuseeya nafaaqada, caafimaadka jidhka iyo maskaxda, dhaqdhaqaqa jidhka, iyo xidhiidhada caafimaadka qaba. | | | | |
| E. Wuxuu raacaa tilmaamaha maamulka daawada iyo daawaynta la oggolaaday, oo ay ku jiraan dhukumentiyada la xidhiidha. | | | | |

Lifaaqa C: Qalabka Is-qiimeynata *SII SOCDA*

■ TUSMADA QEYBTA II. BADQABKA IYO CAAFIMAADKA

II-2. Caafimaadka

| Dhaqan Hirgalaya | Haa | Waa Wali | Ma Hubo | Qoraalada |
|--|-----|----------|---------|-----------|
| A. Waxay baraysaa carruurta iyo dhallinyarada habraacyada nadaafadda iyo fayadhowrka ku habboon. | | | | |
